# JAAMACADDA UMMADDA SOOMAALIYEED

## KULLIYADAHA SHARCIGA — DHAQAALAHA

# WARBIXINTII AQOONISWEEYDAARSIGA BEELAHA DANWADAAGTA BEERALEYDA

## K/WAARREY — SABLAALE — DUJUUMA

XARUNTA DHEXE 28 — 30 Sebteembar 1975

INDIANA UNIVERSITY
LIBRARIES
BLOOMINGTON

JAAMACADDA UMMADDA SOOMAALIYEED

XARUUNTA DHEXE

Aqoon-isweydaarsiga Ardada Laamaha Sharciga iyo Dhaqaalaha.

28kii bishan seLtemtar ee sannadkan, Xaruunta Dhexe ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, waxaa ka bilowmay dood aqoon-isweydaarsi oo ay ka soo qayb galeen dhammaanta Ardada Kulliyadaha Sharciga iyo Dhaqaalaha oo hawlwadeenka ka ahaa xaruumaha beeralayda ah ee Du:uma Sablaale iyo Kurtunwaarey.

Shirkaas waxaa furay guddomiyena ka ahaa Madaxweynaha-ku-xigeenka GSK, isla markaana ah Guddoomiyaha Guddiga Golaha Sare ee Kacaanka u qaabilsan Dhaqaalaha, Jaalle Sarreeye Gaas Xuseen Kulmiye Afrax, waxaa kale oo goob joog ka ahaa, isagoo uu wehliyay Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, Jaalle Dr. Cabdisalaam Shiikh Xuseen, iyo Hormuudyada Kulliyadaha Sharciga iyo Dhaqaalaha, Jaalle Cabuud Muscad iyo Jaalle Maxamad-daahir Xaaji Cabdullaahi.

Jaalle Kulmiye, Madaxweyne-ku-xigeenku, khudbaddii furitaanka oo uu ardada Jaamacadda u jeediyay (oo halkan ayadoo dhan ku lifaaqan) waxay ahayd mid ku qeexan kaalintii dhaxalgalka ahayd ee Aradada Jaamacaddu ka qaateen gurmadkii weynaa ee waddaniga ahaa oo lagu samatabixinayey gaasaskii walaalheen ahaa oo abaartu ku habsatay, wuxuuna ku tilmaamay habka Soomaaliya wax ku waddo mid Afrika oo dhan iyo waddamada soo koraya toosin doona, tilmaan mingurris wacanna u noqon doona.

Markii Jaalle Kulmiye hadalkii soo gabagabeeyay waxaa furmay shirkii waxaana ka hadlay saddex arday oo ka kala socday degmooyinka Sablaale, Kurtunwaarey iyo D'uma, waxayna bixiyeen warbixin buuxda oo ku saabsan sidii qiiraha lahayd ee Ardada Jaamacaddu ugu gargaareen walaalahood, uguna bareereen dagaalka |iddiga waxyeellada abaarta iyo libtii ay ka soo hooyeen iyaga oo cuskana cilmi, caqli iyo muruq hawsha wada jiibinayey.

Warbixintaasi waxay kale oo ku saabsanayd xogwarran Ardada Jaamacaddu ka bixinaysay sidii ay u fuliyeen hawlihii kala geddisnaa oo xaruumahaas ka socday, iyo sidii ay u kiciyeen isugunna dubbarideen maamulkii iyo agaasinkii dadka, iyagoo so bandhigay tirakoobyadii ugu danbeeyey ee ku saabsanaa dadka xoogga ah oo beeralayd noqon kara, ardada dhallanka ee dugsiyada aadi kara iyo dadka hawlgalka ah.

Si looga hortago waqtiga oo dheeraada waxaa la saaray Guddiyo iyo xoghayn isku soo dubbarida ajeendooyinka laga hadli lahaa. Waxaana go'aan lagu gaaray in dhammaan arrimaha la qaadaadhigayaa ku koobnaadaan kuwa hoos ku xusan.

—

1. Dhismaha iyo magaaleyrta:
2. Kicinta iyo hanuunirta:
3. Maamulka bulshada:
4. Waxbarashada:
5. Caafimaadka:
6. Dhaqaalaha iyo beeraha.

Qodobbadaas waxaa soo diyaariyay Guddi ka koban saddex qof oo mid waliba xaruun ka socdo waxayna wadajir u soo saareen warbixin iyo xo warran ku saabsan sida wax u socdaan, meelaha la dhaliili karo, talo iyo tusaalooyin guud oo giddi u jeeda in la dedejiyo barwaaqaynta beesha danwadaagta ah.

Mawduuc kasta markii uu dhammaado waxaa doodu u furnayd dhammaan ardada Jaamacadda oo kansho loo siiyay inay waxna ku daraan, kana doodaan arrimhii laga hadlayay.

Intii shirku socday waxaa ka soo qayb galay oo marti u noqday, Jaalle G/le Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar, ahna Guddoomiyaha Guddiga Barwaaqaynta Bulshada Danwadaagta Beeralayda iyo Kalluumeysatada iyo Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Maxamed, Xoghayaha Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, waxayna shirkaas ka soo jeediyeen khudbado ay ardada ugu caddeynayeen meelaha mugdigu uga jiray oo ku saabsan jaangoynta aayatiinka loo dhigay bulshadaa danwadaagta ah, waxayna Madaxdu ka jawaabeen su'aalaad soo ban baxay intii aqoon-isweydaarsigy socday.

Intii aqoon-isweydaarsigu socday waxaa ardadu ku kulmeen 7 fadhi, waxayna dooddii ebyantay 30kii Sebtember 1975, iyadoo uu xiray Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, isagoo ka wakiil ah Madaxweyne-ku-xigeenka GSK, Jaalle S.Gaas Xuseen Kulmiye Afrax.

Markii shirku dhammaaday ardadu waxay soo saareen talooyin xaashidaan ku lifaaqan oo laga soo dhiraandhirayay arrimihii muddada saddexda casho ah laga hadlayey.

# T A L O O Y I N

a) Dhismaha iyo magaalaynta:

- Mashruuc kasta oo ay Dawladdu ka fulineyso degmooyinka cusub ee danwadaagta ah in loo dhiibo dad aqoon caar ahaaneed u leh mashruucaas, lana siiyo awood iyo warbixin buuxda oo ku saabsan fulinta mashaariicdaas.

- In si deg deg ah loo sameeyo "maabalka" degmooyinka dadka la dejinayo, lana waafajiyo habka bulshaynta danwadaagta beeralayda ee degmooyinka kala geddisan.

- Haddii ay suurta geli karto, waa in laga hortagaa nabaad-guurka dhulka oo ka imaanaya dhirta la jarayo xagga dhismaha, taasoo ay suurtowdo in lagu beddelo "bulukeeti" iyo jilay laga samayn karo dhoobo iyo caws oo isku jira oona la dubo, waxaana jirtay in Laartabuur laga sameeyay tijaabo ceynkaas ah.

- In dhismaha guryaha la dedejiyo, maadaama xilliga deerta ah uu soo dhawaaday dadkana badidiisu ay xagga hoyga ka liitaan.

- Tababar xagga hawlaha farsamada dhismaha in laga furo si degmada isugu fillaato, loogana hortago dhismaha nidaamka daran.

- Qalab iyo gaadiid ku filan degma kasta inay hesho, si loo hormariyo hawsha dhismaha.

- In degma kasta laga furo laamaha xafiisyada kala duwan, sida boostada, bangiyada, iwm.

- Maadaama marka roobku da'o jidadka degmooyinka cusub la xiriiriya magaalooyinka kale ay xirmayaan, siiba degmooyinka Sablaale iyo Dujuma oo ay badxireen noqdaan, waxaa lagama maarmaan ah in jidadkaa lo hagaajiyo, loona dhiso.

- In degmooyinka u soo gurmaday ka qaybqalka dhismaha degmooyinka cusub aanay ka goosan gacan siinta ee horay u billaabeen.

- Haddii guryo-dhiska laga gaarsiin karin xilliga deerta, in dadka oo idil la simaa hac adag si roobka uga gaashaantaan.

- In guryasiinta ay ku habeysnaato hadba tirada qoyska inta qof uu ka koobmo.

- Dadka la dejiyay Degmada Baraawe oo ka cawday qaniin kud-kude in guryaha rasmiga ah looga dhiso meel caafimaad qabta.

- In degdeg loo dhammaystiro dhismaha bakhaaraha keydinta raashinka iyo daawada.

------00000oooo0000--------

TALOOYINKA KICINTA IYO HANUUNINTA

- In si degdeg ah loo geeyo Geelaha Danwadaagta ah qalabka kicinta iyo hanuuninta looga baahan yahay.

- In shaqaale Xafiiska Siyaasadda MGSK ku filan la geeyo, ayna ahaadaan kuwo aqoon dheer iyo waayo aragnimo leh.

- In beesha danwadaagta ah loo diyaariyo casharro gaar u ah, si deg deg ahna loo geeyo.

- In furriinka badan wax laga qabto, loona hirgeliyo Xeerka qoyska.

- In riwaayadaha iyo filimmada la geynayo beelasha danwadaagta laga fiirsado, loona xulo iyadoo isla markaas laga ilaalinayo wixii bulshada cusub fasahaadinaya.

- In shaqaalaha loo dirayo beesha danwadaagta ah loo xulaa, noqdaanna kuwo aqoon ballaaran u leh dhaqanka bulshadeenna miyiga, dad aqoon wanaagsan u leh diint Islaamka iyo aftahamnimo ay ku soo jiidan karaan dadweynaha.

- In macnaha magaalada si fiican looga dhaadhiciyaa, lana baraa.

- In dhammaan Golayaasha Hanuuninta magaalada Xamar laga sii daayo waayo-aragnimada Ardada Jaamacadda.

- In magacyada naxdinta leh laga daayo, sida: ceyrta, dadka tabaalooboy, dadka abaartu dhammeysay maalkooda iyo dadka maatada ah.

- In haddii ay suura gasho la soo tuso Bulshada danwadaagta beeraha cuntada degdegga (crash programme).

- In la abaabulo cayaaraha loo yaqaan "folkolorka" (cayaarah hiddaha iyo dhaqanka).

- In hanuuninta ay u badnaato ku dhex jir iyo la shaqeyn.

- In Guddiyada beesha danwadaagta ah la siiyo fursad ay ku soo booqdaan magaalooyinka si waayo-aragnimadooda kor loogu qaado.

- Waa in Xafiiska SMGSK si degdeg ah beesha danwadaagta ugu diraan dhammaan calaamadaha Ururrada jitimaaciga ah.

------000ooo000--------

TALOOYINKA MAAMULKA BULSHADA

- In la mideeyo nidaamka maamulka iyo guddiyada hawlwadeenka ka ah degmooyinka danwadaagta beeralayda ee haatan kala duwan.

- In dib loo habeeyo, lana fududeeyo, nidaamka raashin qaybinta xaafadaha.

- Xagga gaadiidka, iyadoo la tixgelinayo dhibaatada dhaqaalaha iyo ascaarta adduunweynaha, in loo sameeyo degmooyinka cusub gaadiid fudud oo ay ku qabsadaan hawlaha yaryar, sida nadaafadda xaafadaha, gudbista raashinka, dhismaha yar, iwm.

- In dadka xagga beeraha wax ka tari karin la baro xirfad ama maharad kale oo ay wax ku soo saari karaan, si ay dulsaar ku noqon dadka ama bulshada inteeda kale.

- In la kordhiyo ceelasha si dadku u helaan biyo ku filan.

- In Wasaaradaha iyo Wakaaladaha ku shaqa leh ay ka dhisaan degmooyinka cusub bakhaarrada cuntada, si looga baddbaadiyo dhibaatada ka iman karta xagga dabeecadda.

- Inta la awoodi karo in dadweynaha laga baahi tiro xagga dharka, maacuunka wax lagu karsado ama lagu qaybsado, qalabka dhismaha, sida carweynta, badeel, gudin, iwm. iyo saabuunta dharka.

- In degdeg loo gaarsiiyo degmooyinka cusub cusbada cuntada lagu daro iyo miisaano wax lagu cabiro.

------0000oooo0000------

TALOOYINKA WAXBARASHADA

- In si degdeg ah loo dhiso dugsiyo ku filan beelaha danwadaagta beeralayda.

- In si degdeg ah loogu diro macallimiin beelahaas, iyadoo gaar ahaan la tilmaamayo in la dedejiyo tababarka haatan u socda ardadii ka soo baxday Dugsiyada Sare, Shaqada Qaranka ay halkaa ku gutaan.

- In laga haqabtiro qalabka waxbarashada;

- In laga dhiso degmooyinkaas dugsiyada la seexdo, lagana barto cilmiga beeraha.

- In dadka farsamayaqaannada ah loo furo tababarro gaagaaban.

- In laga furo degmooyinkaas dugsiga dhaqaalaha guriga:

- In la joogteeyo waxbarashada dadka waaweyn.

- In si dhakhso ah looga furo dugsiga dhexe degmooyinka cusub, waayo waxaa jira arday badan oo haysata shahaadooyinka dugsiyada hoose.

- In laga hirgeliyo dhammaan beelaha danwadaagta dhismaha dugsiyada xannaanada carruurta, taasoo awood u siinaysa inay shaqaalaha bulshada cusub aadaan shaqooyinkooda ayagoo aan ka welwelayn carruurtooda.

- In waxbarashada ardada beelaha cusub ee danwadaagta beeralayda loogu daro maadooyinka dugsiyada dhexe wixii ka bilowda cilmiga beeraha.

- Si loo helo tababar degdeg ah oo gaarsiisan heer sare, in Wasaaradaha iyo Wakaaladaha arrimaha tababarrada farsamayaqaannadu khuseeyaan ay u qorsheeyaan, una dejiyaan degmooyinka cusub ee danwadaagta barnaamij tababareed xagga farsamayaqaannada oo si adag loo hirgeliyo, halkii degmo kasta tababarrada sidii ay ka fursan waayaan ay ugu dhaqaaqi lahaayeen.

----0000ooo000-----

TALOOYINKA CAAFIMAADKA

- In degdeg looga dhiso degmooyinka cusub isbitaallo rasmi ah, sariirana leh.

- In degmooyinka cusub la geeyo raajo iyo shaybaarro, si loo kala saaro dadka buka iyo kuwa fayow.

- In takhaatiir "specialisti" ah la geeyo, gaar ahaan kuwa wax qala iyo kuwa cuduraada haweenka iyo carruurta.

- In kormeer takhaatir loo diraa beesha cusub oo ay soo wadaan dadka qaba cudurro aan meeshaas waxba laga qaban karin, sida dadka waalan, hernia, tumore, iwm.

- In musqulaha laga beddelo habka ay hadda u dhisan yihiin oo tobankii qoysba mid loo dhiso, laguna ogaado.

- In joogofeyda olole lagu qaado intii ayan curyaaminin dadka ka shaqayn lahaa beeraha iyo dhismaha.

- hanuunin caafimaad gaar ah la siiyaa dadweynaha beesha danwadaagta ah si looga raarico waxtarka iyo waxyeellada daawadu ay leedahay.
- In laga feejignaado cuntada qasaca ee makhaasiinnada ku beddelantay.

---OOOoooOOO---

TALOOYINKA DHAQAALAHA

- Waa in loo diraa beelaha danwadaagta cusub dad aqoon gaar u leh Cilmiga Beeraha, dhaqaalaha, sharciga, injinyeeriyada iwm. si ay u soo darsaan dabadeedna xallis looga gaaro iyadoo isla markaana xiriir la leh dadka beelaha danwadaagta cusub.
- Waa in laga abuuro beelaha danwadaagta dhexdooda meelo lagu nasto waxna lagu cuno inta shaqada lagu jiro.
- Wa in xoolaha ummadda ay leedahay meel kasta ha joogeene si gaar ah loo ilaaliyo.
- Waa in la hirgeliyaa mashaariicda loo yaqaan "Infrastruttura" sida biyaha, dugsiyada, isbitaallada iyo isgaarsiinta, hay'adaha kala duwanna ay si deg deg ah u gaeyaan wakiilladooda.
- In sharciga loo dejiyey beesha danwadaagta cusub uu ka mid noqdo duruusta laga dhigo laanta sharciga.
- Waa in la darsaa warshadaha ku habboon danwadaagta lana helaa gundhiggii lagu hirgelin lahaa.
- In lagu abuuro danwadaagta jawi dhaqaaleed iyo iskufillaasho lagana ilaaliyo lahaanshaha gaar ahaaneed.
- In si habsami ah loo qorsheeyo hawlaha ka socda beesha danwadaagta si looga foojignaado iskahorimaadkooda iyo in qofwaliba hawl gaar ahaaneed oo xafiisyada lagala socdo lagu ogaado.
- In beelaha dhexdooda laga abaabulo tartan wax soo saarid, oo ku dhisan koox-koox looguna talagalaa dhiirri gelin noqon karta raashin kordhin iyo wax la mid ah.
- Waa in dadka macallimiinta u noqonaya bulshada cusub kala qayb qaataan shaqada isla markaana la tashadaan oo aysan dareensiinin kala sarreyn iyo kala soocnaan.

- Si loogu abuuro kalsooni iyo shaqo jacayl, waa in dad ka mid ah bulshada la dejiyey loo suura geliyaa inay soo siyaartaan meelaha lagu mataaneeyay si kor loogu qaado wacyo-aragnimadooda iyo xamaasaddooda.
- Waa in la abuuro xafiis dhexe oo hay'adaha kala duwan ee dawladda ka heli karaan dhammaan wararka ay uga baahan yihiin beelaha si ay u qorsheystaan, xafiiskaas oo ku xiran Agaasinka Guud ee M.G.S.K.
- Waa in teknolojiyada lagu isticmaalayo ay noqoto mid kor u qaadaysa wax soo saaridda iyadoo la tixgelinayo aqoonta isticmaalka dadka iyo hantida la haysto.
- Waa in baaris lagu sameeyaa carrada beeraha si loo dedejiyo hirgelinta mashruuca si loo hubiyo nooca saraca ku habboon beeraha beelahaasa, waana in la xalliyaa dhibaatooyinka hor taagan xagga qalabka ama dayactirka qalabka beeraha, batroolka iyo tirada makiinadaha shaqada.
- Waxaa loo baahan yahay inay madaxda sare kormeer joogta ah ku sameeyaan beelahaas aadna loo ilaaliyo habeynta hawlaha kala duwan oo ka socda.
- Dadka kalluumeystada ee haatan ku nool beelaha beeraleyda waa in deg deg loogu gudbiyaa beelaha kalluumeystada ah.
- Waa in beeraha beelaha cusub lagu xiraa xoolaha, sida digaagga, idaha, lo'da, shimbirida, iwm.

----000oooOOO----

**KHUDBADDII MADAXWEYNE KU XIGEENKA GSK ISLA MARKAANA AH GUDDOOMIYAHA GUDDIGA GSK U QAABILSAN DHAQAALAHA JAALLE SARREEYE GAAS XUSEEN KULMIYE AFRAX UU KA JEEDIYEY XARUUNTA DHEXE EE JAAMACADDA U M M A D D A**

Jaallayaasha Dhallinyarada Soomaaliyeed, Madaxda Jaamacadda,

Dhallinyarada saaka halkan lagu kulmiyey oo wax ka barta Jaamacadda Ummadda Laamaha Sharciga iyo Dhaqaalaha waxay soo guteen waajibkii dalka ka saarnaa, waajibkii kacaankooda, waajibkii dadweynahooda kolkii ay duulimaad ku qaadeen dhibaatadii dadweynaha haysatay.

Sidii weligeedba caadada ahaan jirtay kacaanku ololeyaal aan kala go'in buu abaabulayey waxaana fulin jiray dhallinta dalka oo ahayd horseedkii ummadda heer kastaba ha joogaane.

O.H.R. guushii laga gaaray waxaa dhaliyey ardada soomaaliyeed oo rumeysay baaqii Aabaha Ummadda Soomaaliyeed Jaalle Siyaad. Soo noqodkoodii waad ogeydeen dabbaaldeggii weynaa ee loo dhigay. Olole shaqo oo dalka lagu hormarinayey oo kaa ka horreeyey baa jiray, dalka oo meel kasta qabyo ka ahaana waxaa lagu dhisay iskaa wax u qabso kacaanka kadib.

Marka, sida aad ogtihiin dhallinyarada baa ugu horreysay cid la carbiyo waxna la baro sidii Ceel Jaalle oo kale, tababarradaa oo la'aantood aanan ku guuleysaneen O.H.R. Ardadu xilkii saarnaa waa ka soo baxday addunkoo dhanna waa laga ammaanay.

Waxaa jirtay in Jaalle Cabdirisaaq oo ka mid ah G.S.K. uu Dalka Iiraan tegay iyadoo lagu tartamayo billadda adduunka oo la siiyo dalalka hirgeliyey muddo gaaban far iyo af qorid, Soomaaliyana waxay soo qaaday billadda Ittixiaadka Soofiyeeti uu u dhigay adduunka ayadoo Ololaha H.R.M. ku guuleysatay.

Billaddaas ay Soomaaliya soo qaadatay waxaa dhaliyey dhallinyaradii tababarka la siiyey waxaana taa ka dhashay in Soomaaliya wixii ay doonto ay qabsan karto iyadoon cidna u yeeranin.

Imminkaba mashaariicda socoda iyo taad idinku ka timaadeen ma aha wax adduunka laga yaqaanno, waa wax hor leh. Taariikhdey geli doontaa idinkuna waad ka sheekeyn doontaan. Ilaa hadda sidaan ognahay dunida ciidan intaa la eg oo ay dabeecaddu dhibaato gaarsiisay oo meel la isugu soo ururiyey iyagoo naftoodii dambe la tabcayo si ay dadnimadooda u soo saaraan oo ay ka baxaan darxumida iyo saboolnimada.

Ma jirto taariikhda meel dejin ka hirgashay hadda ka hor. Taa waxaa keentay in ciidamada qalabka sida , shaqaalihii iyo ardaydii iyo xoogagga kaleba ay shaqo ku dhaqaaqeen oo wax joojin karin aysan jirin.

Maanta inta kulliyado ah ee ay Jaamacaddu leedahay waa lagu urursan yahay oo waxaa ku kulmaya ardayda jaamacadda ee ka soo noqotay raridda iyo dejinta.

Guushi ay halgankii weynaa ka soo hooyeen iyo waxyaabihii ay soo arkeen sidii looga arrinsan lahaa, wixii la is fari lahaa, siday aathaar idiinku reebatay dejintu iyo waxyalaha ay weli u baahan yihiin iyo sida loo hormarinayo bulshada danwadaagta ah ayaan maanta halkan isugu kaaya keentay..

Adduunku hadba heer buu soo maray, dadkiina dhaqaalaha barta baa wax ka og. Heerka Soomaaliya mareyso xagga dhaqaalaha iyo meesha ay kaga jirto adduun weynaha ayaa la doonayaa in la isku miisaano.

Annagu waxaan nahay kacaan aan oggoleyn in jidkii dheeraa oo dunidu soo martay aannu marno, waxayagu waa deg deg iyo dhaqso, shaqadoo la boobo, garaadka oo la boobo iyo himiladoo la dedejinayo oo meel dheer la saarayo lana hiigsanayo si ay cid walba bar tilmaameed ugu noqoto in aannu u soo boodno heerkii ugu dambeeyey kordhinta dhaqaalaha, Waxaan dooneynaa in bulsho xoolo dhaqato ah aan ka dhigno beeraley, kadibna wershado u yeello, si deg deg ah oo dadaalka loo kordhiyo ayaana arrintaa looga tallaabsan karaa. Waxba ma aha annagu dooni meyno dayaxa inaan gaarno laakiin qeerkayaga meeshuu gaaray inaan gaarno baan dooneynaa oo weliba si dhaqso ah aannu ku gaarno. Haddii ay iyaga laba kun oo sano ku qaadatay annagu sannoyin yar baan dooneynaa inaanu ku gaarno si aannu ula tartanno, taana waxaa dhalin kara

dhallinyarada soomaaliyeed oo kacaanka ah oo aad idinku ka mid tihiin, waayo wax joojin kara ma jiro. Kacaankaanu waa socday, dhallinyaradiisuna waa horuusocod, marka waxaan leeyahay SOOMAALIYA HANNOOLAATO

JAALLE SIYAAD HA NOOLAADO

KACAANKA SOOMAALIYEED HANNOOLAADO

ARDADA JAAMICIYIIINTA AH IYO DHALLINYARADA SOOMAALIYEED OO IDIL HA NOOLAADEEN

JAAMIC[illegible]INTA MAANTA MEESHA KU KULANTAY HA NOOLAADEEN

Dood[illegible]yadii saaka ku saabsanayd in warbixin la dhiibo iyo mida[illegible] kordhisaanba, wixii aad waayo aragnimo soo heshee[illegible] idinkaa halgan iyo dagaal ka yimide waa idi[illegible]uran tahay. Annagu waxaan fulineynaa wixii go'aanno aad [illegible]oo gudbisaan, sidaas iyo HAWL WANAAGSAN.

## WARBIXIN GUUD HAWLAHA ARDADA JAAMACADDU AY KA QABTEEN DEGMADA BEERALEYDA EE SABLAALE

Ardadii Jaamacadda ee ugu horreeysay waxay Degmada Sablaale tageer 27/6/75 ayagoo ay la socdaar dadweyne laga soo daadgureeyey Warle Weyn oo tiradoodu gaareysay 123. Tirada ardadu waxay ahayd 150 oo ka kala yimid kulliyada'a Lafoole Beeraha Daawada iyo Cilmiga.

Dadka la de'iyey markaa ka hor waxay ahaayeen 3/0 ruux. Shaqaala a ooçay cadadiisu aad lay u yareyd badidooda waxay ahaayeen dadweyne ka soo gurmaday degmooyinka Gobolka Sha'eellada Hoose oo ay oogistoodu ku sirayd muddo toddobaad ah. Waxaa kaloo ooçay koox ka socota Cuntada Deg degga ah iyo qaar kale oo la yiraahdo Halcan.

Ardadu xil gaar ah ayey iska saartay sidii ay qayb li'aax uga qaadan lahaayeen isla ha'eenkii ay yimaadeen, de'inta dadkii ay isku qawaarida saarraayeen, biyo dawooyin iyo cunto siintooda.

Subaxdii markuu waaqu baryeyna waxay ku dhaqaaqeen diyaarintii guryaha (kuwa dadka ta'aaleysan la de'iyo iyo kuwo ay ayagu degaan).

Cacdamaa ay lagama maarmaan tahay in dad kasta oo meel isla ooga ay yeeshaar maamul, iskana dam'eeyaan, ayaa ardadu iska doorteen guddi soo ha'eeya qayb a'a shaqooyinka looga baahan yahay iyo sidii ay u qa'an lahaayeen. Waxay ugu horreyntii magacaabeen guddi dhexe ee ardada oo ka koo'an arday ka socota laan kasta ee aamacadda ka mid ah ee ardayi Sablaale ka oogto.

Guddigii dhexe wuxuu asagu'a magacaabay guddiyada soo socda

1) Guddiga Dhismaha
2) Guddiga De'inta
3) Guddiga Nabuurinta
4) Guddiga Waxbarashada
5) Guddiga Daawada
6) Guddiga Cuntada.

GUDDIGA DHISMAHA Waxaa loo xilsaaray inuu u diyaariyo dadka soo degaya ee hooylaawayaasha ah waabo ay galaan iyo inay u dhisaan kuwa aqallada sita marka ay soo degaan.

GUDDIGA DEJINTA Waxaa loo xilsaaray inay soo dhoweeyaan dadka soo degaya, baabuurta ka de'iyaan, cunta siyaan kaddibna tiriyaan.

GUDDIGA NABUURINTA Waxaa xil ka saarnaa kicinta, baraarujinta iyo bisleynta maskaxda dadka la de'inayo iyo soo saaridda dadka xoogga leh oo ku jira dhexdooda.

GUDDIGA WAXBARASHADA: Waxaa loo xilsaaray habeynta barnaamijka waxbarashada, isku duwidda ardada gaartay da'da dugsiga, soo ururinta dadka wax dhigi kara ee dhexdooda ku jira, ururinta macallimiinta Quraanka.

GUDDIGA DAAWADA: Wuxuu ka koobnaa ardada laanta daawada wuxuuna xilkoodu ahaa inay bukaan-socod-eegtayaasha ka shaqeeyaan, inay xaafadaha ku dhex wareegaan oo dadka aad u liita guryahooda ugu tagaan iyo inay dawooyinka degdegga ah gaybiyaan marka dadka la soo dejiyo.

GUDDIGA CUNTA: Waxaa xilkoodu ahaa qaybinta cuntada dadka la siinayo iyo habeynta bakhaarka cuntadu ku keydsantahay.

Barnaamijaas waxay ku socdeen in mudda ah ayadoo ay shaqadu si wanaagsan u socotay, inkastoo ay la kulmeen dhibaatooyin ka yimid qalabka lagu shaqeeyo oo aad u yaraa.

Markii dadkii degmadu ay soo kordheen waxaa la ama maarmaan noqotay in ciidan loo kordhiyo qaybaha qaarkood shaqada oo ku farabadatay awgeed, qaar kalena dad laga soo wareejiyo ayagoo shaqadii loo diray heerkii la doonayey gaarsiiyey. Markaas ayaannu guddiga waxbarashada yareynay ardadii ka soo baxdayna ku kala darnay guddiyada dhismaha, cuntada iyo dejinta. Guddiga waxbarashadu waxay xilkoodi si rasmi ah ugu wareejiyeen Wasaaradda waxbarsahda ayagoo weydiiyey macallimiin iyo qalabka waxbarashada.

Bisha Luulyo 29keedi ayaan ku soo biirnay ardadii hore u joogtay, anaagoo badidaya ah shaqaalaha dawladda. Tiradayadu waxay ahayd 101 arday.

Waxaan annaguna iska soo dooranay guddi ka kooban affar arday oo labada laan ka socoto: waxaanna ku biirnay guddigii dhexe ee ardada oo hore u jiray. Shaqadii socotay ayaan dhinacayaga ka galnay ayadoo ardada loo kala qaybiyey sidii hore oo ay shaqadu u habeysnayd.

Guddiga dhexe ee ardada iyo guddiga Degmada markay indhaindheeyeen habkii shaqadu u socotay iyo mashaakilka degmada soo foodsaaraya waxay garteen, ayagoo tilmaamo ka helay guddoomiyaha guddiga dejinta, inay beddelaan habkii hore oo lagu shaqeyn jiray.

Habka cusub wuxuu u dhisnaa sida soo socota:

1) In degmada xaafad xaafad loo qaybiyo, xaafad walbana arday guddoomiye u noqda loo xilsaaro.

2) In xaafad waliba u qaybsanto shan laamood, oo shan arday oo beeldaajiyeyaal ah loo magacaabo.

3) In laan waliba ka kootnaato 5 xubnood, oo 5 arday oo horjoogayaal ah loo xilsaaro.

4) In xaafad waliba loo xilsaaro 5 arday oo cunto qaybiyeyaal ah oo mid kasta laan qaabilsan yahay.

5) In 10 arday loo magacaabo tirakoobka guud ee degmada.

6) In ardayda qaarkeed ay la wareegaan maamulka degmada (xisaabaha, bakhaarrada, xoghaynta, hantidhowrka, iwm.) ayadoo arday walbo lagu aaminayo shaqadii uu soo hayn-jiray mid la cayn ah.

7) In arday loo xilsaaro hanuuninta guud ee degmada.

8) In ardayda laanta beeraha loo xilsaaro diyaarinta tababarrada beer/aeyda.

9) In ardayda laanta daawada iyo kuwii ahaanjiray shaqaale Wasaaradda caafimaadka loo xilsaaro nidaaminta caafimaadka guud ee degmada ayagoo shaqadooda loo kala qaybiyey xaafad xaafad.

10) In ardayda xirfadda u leh sbortka loo magacaabo habeynta cayaaraha degmada.

11) In habeynta dhismaha guud ee degmada ay qayb ka qaataan ardayda joometerrada ah.

12) In habeynta iyo nidaaminta ubaxa loo xilsaaro ardayda qaar shaqadaas hore u soo qabtay oo waayo aragnimo gaar ah ku leh.

13) In arday loo xilsaaro warbixinta guud ee degmada (Sonna iyo Raadiyaha Xamar).

14) In arday loo xilsaaro xallinta mashaakilka dadka la dejiyey soo foodsaaraya (dad ka maqan, kuwo ku soo biiray, kuwa guuraya, iwm.)

15) In arday loo xilsaaro baarista cilmiga ah ee lagu sameynayo, degmada iyo dadka la dejinayo labadaba.

Intaas oo shaqa ah ardayda gacanta ku haysay oo ay ku soo biireen arday ka timid Xeryaha Raridda waxay xiriir la lahaayeen guddiga dhexe ee ardada jaamacadda, guddigaas oo laba xubnood ku lahaa guddiga kacaanka ee degmada.

Labadaas arday oo ka mid ah guddiga dhexe ee degmada, waxay guddiga degmada u gudbin jireen wixii shaqo ah ee la fuliyey iyo wixii mashaakil ah ee lala kulmay, waxayna guddiga ardayda u soo gubin jireen awaamirta la doonayo in degmada laga fuliyo.

Waxaa shaqadu ku fuleysay xaafadeyn. Xaafad waliba gaar ayey hawsheeda u socodsiineysay ayagoo ku tartamayey muddada dhammeystirka shaqada.

Shaqada qabashadeeda waxay ardadu ku dhirac wadeen diyaarinta dadkii hawsha iyo mas'uuliyadda kala wareegi lahaa oo laga soo dhex saaray dadweynaha xaafad waliba deggan kuwa ugu xilkasnimada badan. Markii aannu is niri heer wanaagsan ayey marayaan ayaan si tijaabo ah bisha Sebtember affarteedi xilkii ku wareejinnay shaqadiina ayaga u deynay.

Si aanan fileynin ayey shaqadii u maamuleen xilkiina uga soo bexeen, waxaase jirtay inay weli u baahnaayeen in loo tababaro habka maamulka iyo sidii ay dhexdooda xiriir u yeelan lahaayeen ayadoo la dhowrayo jaran jarada ay ku dhisan yihiin.

Waxay ardadu maalin walba u tegi jireen kormeer si ay ula socdaan sida wakiillada dadweynuhu shaqada u fulinayaan ayagoo isla markaa u macneynayey si dhab ahna ugu tusaaleynayey sida loo xalliyo dhibaatooyinka soo foodsaaraya maalin walba.

Inkastoo ay sidaa tahay waxay weli u baahan yihiin dad maamul iyo xisaab yaqaan ah in muddo ah.

Annagoo soo gabagabeyneyna si aannu idiin siinno masawir cad ee degmada beerlayda Sablaale, waxaa halkan ku lifaaqan shaxo tirakoob (tabelle) oo ku saabsan tirada dadweynaha oo Xaafadeysan, inta qoys oo ay ka kooban yihiin, inta beeraleyda noqon karta, inta curyaanka ah, inta arday da'da waxbarashada gaartay, , inta xoogsatada ah, inta duqowda ah, inta carruur yar yar ah (0-5), xeryaha ay ka kala yimaadeen iyo tirada xero walba ka joogta iyo dhulka beeraha loogu tala galay.

DADKA KU NOOL DEGMADA BEERLEYDA SABLAALE OO U KALA BAXSAN QOYSAS

| TIRO | QOYSAS | T.G. DADKA |
|---|---|---|
| 1 | 60 | 60 |
| 2 | 271 | 542 |
| 3 | 475 | 1.425 |
| 4 | 704 | 2.816 |
| 5 | 859 | 4.295 |
| 6 | 835 | 5.010 |
| 7 | 678 | 4.746 |
| 8 | 481 | 3.848 |
| 9 | 307 | 2.763 |
| 10 | 165 | 1.650 |
| 11 | 79 | 869 |
| 12 | 55 | 660 |
| 13 | 30 | 390 |
| 14 | 17 | 238 |
| 15 | 7 | 105 |
| 16 | 4 | 64 |
| 17 | 9 | 153 |
| 18 | 2 | 36 |
| 19 | 2 | 38 |
| 20 | 2 | 40 |
| DHAMMAAN: | 5.042 | 29.748 |

Tira dhexdhexaadka qoysaska waa 29.748:5042 = 5, 8 (6)

DADKA KU NOOL DEGMADA BEERALEYDA SABLAALE QOYSASKA BEERALEYDA NOQON KARA IYO KUWA AAN NOQON KARIN

| XAAFAD | Q.BEER.NOQON KARA | Q.AAN BEER. NOQON KARIN | T.G. | T.ISKAASH |
|---|---|---|---|---|
| JEN DAAUUD | 900 | - | 900 | 9 |
| HIDAAYO | 596 | 15 | 611 | 6 |
| IFTIIN | 696 | 4 | 700 | 7 |
| JAAMACADDA | 500 | - | 500 | 5 |
| GAHAYR | 1.031 | - | 1.031 | 10 |
| OKTOOBAR | 697 | 3 | 700 | 7 |
| BARWAAQO | 597 | 3 | 600 | 6 |
| DHAMMAAN | 5.017 | 25 | 5.042 | 50 |

DADKA DEGGAN DEGMADA BEERLAEYDA

SABLAALE OO CURYAANKA AH

(DA'DA 15 - 59 )

| XAAFADDA | TIRADA DADKA |
|---|---|
| JEN DAAUUD | 32 |
| HIDAAYO | 17 |
| IFTIIN | 19 |
| JAAMACADDA | 16 |
| GAHAYR | 39 |
| OKTOOBAR | 23 |
| BARWAAQO | 22 |
| DHAMMAAN | 168 |

DADKA KU NOOL DEGMADA BEERALEYDA
SABLAALE OO U KALA BAXSAN DA'DA IYO CAYNKA

| DA'DA | LAB | DHEDDIG | TIRO GUUD |
|---|---|---|---|
| 0 - 5 | 3.183 | 2.605 | 5.788 |
| 6 - 14 | 5.511 | 4.509 | 10.020 |
| 15 - 59 | 6.682 | 6.560 | 13.242 |
| 60+ | 414 | 284 | 698 |
| DHAMMAAN: | 15.878 | 13.870 | 29.748 |

## DADKA DEGGAN DEGMADA BEERALEYDA SABLAALE OO U KALA BAXSAN XERADA LAGA SOO RARY

| XARUUNTA GARGAARKA | LAB | DHEDDIIG | T.G. | % |
|---|---|---|---|---|
| 1. BEER | 2.399 | 2.468 | 5.367 | 18.0% |
| 2. BIXIN | 429 | 363 | 798 | 2.1% |
| 3. BURAAN | 200 | 110 | 310 | 1.0% |
| 4. JEEXAN | 2.133 | 1.838 | 3.971 | 13.9% |
| 5. JIIDAALI | 261 | 248 | 509 | 1.1% |
| 6. XARAR DHEERE | 1.562 | 1.486 | 3.048 | 12.0% |
| 7. XALIN | 585 | 583 | 1,068 | 3.6% |
| 8. XORGOBLE | 251 | 202 | 453 | 1.1% |
| 9. DARYALE | 2.270 | 2.071 | 4.341 | 14.6% |
| 10. SHIMBIRAALE | 431 | 358 | 889 | 3.0% |
| 11. DHUDO | 22 | 12 | 34 | 0.1% |
| 12. CEYNABO | 3.075 | 2.697 | 5.772 | 19.0% |
| 13. GALDOGOB | 758 | 683 | 1,441 | 4.8% |
| 14. GAHA | 55 | 59 | 140 | 0.4% |
| 15. LIBAAXYAALE | 392 | 304 | 686 | 2.3% |
| 16. LIGLE | 215 | 49 | 264 | 0.9% |
| 17. HAADLE | 341 | 330 | 671 | 2.2% |
| 18. ISKUSHUBAN | 9 | 3 | 12 | 0.1% |
| DHAMMAAN: | 15.878 | 13.870 | 29.748 | 100.0% |

## DHULKA BEERALAH LOOGU TALA GALAY DEG.SABLAALE

| | | |
|---|---|---|
| 1. Dhulka loogu tala galay beeridda | 18.000 | EKTAAR |
| 2. Inta ay dawladdu faleyso | 3.000 | EKTAAR |
| 4. Inta dadweynuhu uu falayo | 2.000 | EKTAAR |
| 4. Inta dhul falan oo beerid diyaar u ah | 2.000 | EKTAAR |

oooooo0000ooooooo

# TIRAKOOBKA GUUD EE DEGMADA BEERALEYDA SABLAALE

| XAAFAD | TIRO QOYS | CARRUUR 0-14 | XOOGSATO 15-59 | DUQOW 60+ | DHAMMAAN |
|---|---|---|---|---|---|
| HIDAAYO | 55 | 1.882 | 1.527 | 81 | 3.490 |
| BARWAAQO | 57 | 1.793 | 1.577 | 67 | 3.437 |
| GAHAYR | 107 | 3.212 | 2.794 | 159 | 6.165 |
| J/DAAUD | 92 | 2.793 | 2.402 | 98 | 5.293 |
| IFTIIN | 73 | 2.249 | 1.683 | 114 | 4.051 |
| JAAMACADDA | 51 | 1.596 | 1.330 | 62 | 2.988 |
| OKTOOBAR | 71 | 2.283 | 1.924 | 117 | 4.324 |
| DHAMMAAN | 506 | 15.808 | 13.342 | 698 | 29.748 |

Warbixin guud, Degmada Beeraleyda K/Waarey

Abaaraha guud ahaan.

Abaaraha sannadaadan dambe si isdabajoog ah ayeey Afrika uga dhacahayeen, gaar ahaan dalka Soomaaliyeed, taa oo la caddeeyay in ay ka bilaabatay sanadkii 1969kii ilaa iyo sanadkii 19/4, haddii laga saaro 19/1Da.

Sida aan wada ognahay, 19/4tii ayaan shaaca laga qaaday in Gobolla badan oo ka mid ah JDS ay saameysay abaari, xoogeedu haba kala badnaadee.

Si aan waqtina u dhumin, hantina u lumin, loona bad baadiyo dadkii abaartu waxyeeleysay, ayaa waxaa la qor sheeyey si cilmi ah in loogu gurmado. Taa oo keentay in gurmadka loo qaybsho dhawr heer: heerka ugu horeeya oo ah heerkii soo ururinta dadka dhibaateysan iyo furidda xeryaha gargaarka , heerka labaad oo ahaa heerka daryeelka, laguna daryeelaayey xeryaha gargaarka; heerka saddexaad oo ahaa heerka raridda iyo dejinta, iyo kan afraad oo ah heerka barwaaqaynta bulshooyinka cusub.

Haddii aan nahay ardada Laamaha Sharciga iyo Dhaqaalaha, waxaan qayb ka qaadanay labada heer oo ugu dambeysa, gaar ahaan dejinta iyo barwaaqaynta bulshada cusub. Labada heer mid waa dhamaaday, guulbaana laga gaaray, heerka dambe se weli waa socdaa, waxaana ku rajo weynahay in guul laga gaaro. Sidaa daraaded waxaa halkaa ka cad in arrimaha aan halkan ku xuseyno ay ka baxsan yihiin arrimaha la xiriira abaarta iyo raridda.

Markii ay ardo ka mid ah Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ay soo booqdeen xeryaha gargaarka, indhaheedana ku soo arkeen dhibaatooyinka haysta Ummada Soomaaliyeed, ayay talo ahaan u jeediyeen inay diyaar u yihiin ka qaybqaadashada gurmadka dadkii abaaruhu waxyeeleeyeen, taa oo ay ka dambeysay go'aan labada Gole, farahayana in ay ardada Jaamacaddu kaa qayb qaataan raridda iyo dejinta.

Kulliyadaha kala duwan ee jaamacaddu si isdaba joog ah bay uga qayb galeen daryeeliddii dadka abaartu waxyeeleysay.

Bishii luulyo 30keedi, 19.5, ayaa Ardada Laamaha Sharciga iyo Dhaqaalaha ka ambabexeen magaalada Xamar iyaga oo hawlahaay qabaan doonaan u haya niyad saafi ah,

kuna soo dhaweynaya qalbi furan oo ay ku dheehan tahay waxqabasho, lana kaashanahayaan aqoonta gaar ahaaneed iyo waaya aragga ay leeyihiin.

Ardada ka tirsaneyd Sharciga iyo dhaqaalaha ee tag tay K/Waarey 30kii lulyo 1973, waxay tirodoodu ahayd 106.

Taariikhda Kurtun Waarey.

Kurtun waarey waa magaalo da'deedu ku siman tahay ilaa iyo laba qarni, waa magaalod dadka deggan ka koo-ban yihiin beera-qodato iyo xoolo-dhaqato. Magaca K/Waarey inkastoo uu leeyahay fasiraad badan, tan runta ugu dhow waxa weeye inuu magacaasi ka kooban yahay laba eray: Kurtun iyo waarid, taa ee la xiriirta kurtuma dii dhulka laga gubay, markii magaalada la aasaasay oo qaarkood waaray.

K/Waarey waxay ku taalaa meel webiga u jirta 4Km , dhulkeeduna waa dihin yahay, wuxuuna ku habboon yahay beeritaanka, carradeeduna waxay isugu jirtaa dhoobey iyo carro-cad. Roobabku waxay da'aan guga, deyrta iyo xagaaga, hawadeedu waa mid bedbedesha.

Kaalinta ardada:

Ardadu markii ay tageen xarunta dejinta K/Waarey waxay baareen, qorsheeyeenna sidii ay hawsha y qaban lahaayeen, taa oo ay go'aan ku gaareen inay sameeyaan guddiyada hoos ku qoran:

- Guddiga Dhexe ee Ardada;
- Guddiga Xiriirka iyo Dhexdhexaadinta qoyska;
- Guddiga Xisaabaadka;
- Guddiga Waxbarahsada;
- Guddiga Tirakoobka;
- Guddiga Aqoonisweydaarsiga;
- Guddiga Nbabadgelyada;
- Guddiga dhismaha;
- Guddiga Beeraha;
- GUDDIGA Baarista iyo qoraalka;
- Guddiga Caafimaadka;
- Guddiga Maamulka Xaafadaha;
- Guddiga raashin-qaybinta;
- Guddiga isboortiga.

Sida uu guddi kasta magiciisu tilmaamayo, ayuu haw shiisana u hayay, una gudanayay;. Intaa waxaa soo raaca in ardadu ay fureen tababarro fara badan.

Ardadu muddadii ay haysay dejinta waxaa la soo du gudboonaaday dhibab fara badan oo ay ka mid tahay in dad la dejiyo iyada oo roobab laxaad leh ay da'aayeaan,

dhibaato aan la koobi karinna lagala kumaayey socodka keliya, inkastoo ay taasi dhacaysana, Ardadu marnaba kama ay hakan waajibaadkii ka saaraa daryeelidda dadka sida isdabajoogga u soo degaayay, xagga raashin gaarsiinta iyo qaybinta ha ahaato, ama xagga dhismaha hoygooda.

Gaar ahaan waxyaabaha ay durba wax ka qabteen waxaa ka mid ahaa:

- raashinka iyo makhaasiinnada oo ay habeeyeen;
- dhismaha guryo ku meel gaar ah;
- daryeelka caafimaakda iyo ka raridda ama baraarujinta caafimaadka;
- Kicinta iyo hanuuninta dadweynaha;
- waxbarashada;
- intaa oo dhan waxaa ka weynaa hannaanka ay u habeeyeen maamulka dadka la dejiyay, hannaankaasoo suurta geliyey in dadka ay la wareegaan xilka isamaamulkooda.

Xaaladda dadka la dejinayey.

Dadka la dejinaayay waxay u kala qaybsanaayeen dad hoygooda wata iyo dad aan wadan, qoysas uu la socdo dad xoog leh iyo kuwa aysan la socon, dad xoog leh iyo dad maati ah.

Dadka markii ay baabuurta ka soo degaan, inta hoyga wadata isla markiiba waxaa la geeyaa meesha ay ka dhisanahayaan aqalka iyaga oo ay caawinahayaan dadkii ka soo horeeyay iyo ardada. Inta aan hoyga wadan, si deg deg ah ayaa loogu dhisaa buul-caws, iyagoo caawinahayaan dadkii loo soo diray. Sidoo kale maatida iyo qoysaska aan lahayn dad xoog leh. Inkastoo ah ka walwalsanayeen meesha la dejin doono, durba markii ay arkeen sida loo xanaaneynahayo ayay u qushuuceen.

Waaya-aragga nooga kordhay.

Waxaa ka mid ahaa ardada jaamiciyiinta oo gartay nolosha dhabta ah oy ku nool yihiin walaalahooda soomaaliyeed. Isbedel ayaa ku dhacay ardayga jaamiciga ah xagga fikradihii uu ka qabay reer-miyiga, sababtoo ah inuu ogaaday in reer miyiga maskaxdooda furan tahay, muddo gaabanna wax lagu bari karo. Wuxuu kalo fahmay xilka ka saaran Ummadda Soomaaliyeed xagga kicinta, hanuuninta, waxbarashada iyo kordhinta wax soo saaridda. In uu wax maamuli karo, fikrado cusubna curin karo.

T--A--L--O

Iyadoo wixii talo ah oo ku saabsan hawlihii aannu soo qabannay lagu soo bandhigi doono warbixinnada gaar ahaaneed, waxaan talo ku bixineynaa in ardada jaamiciyiinta loo

ogolaado in ay soo saaraan wargeys ay fikradohooda dhan dastaba leh ay ku muujiyaan.

## WARBIXINTA DEGMADA DUJUUMA

### a) TAARIIKHDA DEGMADA

DUJUUMA waxay ka tirsanaan jirtay Gobolka GEDO degmada SAAKOOW, waxayna intii aan gumeysigu dalkeenna soo gelin ka koobnayd dhowr tuulo oo ay ka mid yihiin:Bu'aale, Reebay iyo Jabbi.

Sababta DUJUUMA loogu baxshay meelahaasna waxay tahay iyadoo uu ku badanyahay cayayaanka xoolaha dhiigga ka nuuca oo loo yaqaan Dhuga; sidaa darteed magaca DUJUUMA wuxuu ka soo jeedaa DHUJUUMA oo micnaheedu yahay bersinkii qaniiyada badnaa.

1945tii markii ugu horreysay waxaa kaloo soo sahmiyay in abuurtu dhulku ay tahay mid dalxiiska ku habboon koox dalmareen ah oo talyaani ah, waxayna hubsadeen arrintaas. Sidaa darteed in muddo ah bay fadhiyeen inkastoo aynan ku nagaan.

Iyadoo aan ognahay in xuruufta talyaaniga uusan ku jirin DH, waxay DHUJUUMA UGU dhawaaqeen DUJUUMA, saa ayay ku hirgashay.

Degmada imminka DUJUUMA loo yaqaan waxay ahayd meel hawd ah oo jiq ah oo geeduhu isku dhafran yihiin, waxayna ahayd dhul dihin oo aan cidna hunguriyaysan in ay degto. Waxaa dhulkaa la milicsaday intii uu socday O.H.R.M. markaa oo aanu kala barannay dhulkeena meesha nafciga leh iyo tan nabaad-guurka u halista ah.
Muddo laga joogo hal sano markii abaaruhu dalkeenna xaalufiyeen waxaa labada gole isla meeldhigeen in la dejiyo 50.000 oo qof taasina waxay keentay in DUJUUMA muddo seddex bilood ku siman lagu magaabo magaalo madax Gobol cusub oo loo baxshay JUBBADA DHEXE oo ka kooban JILIB OO laga soo gooyay Gobolka Jubbada Hoose Bardheere iyo Saakoow oo laga soo gooyay Gobolka Gedo.

Gobolka Jubbada Dhexe wuxuu noqon doonaa aayatiinka halbowlihii dhaqaalaha Soomaaliyeed marka ay dhamaadan mashaariicda waaweyn oo ay ka mid yihiin 30.000 oo hektar oo DUJUUMA laga falayo, mashruuca FAANOOLE ee Jilib iyo mashruuca sonkorta ee MARKABLE ee degmada Bardheere.

DUJUUMA waxaa markii ugu horraysay bishu markii ay ahayd 27/6/1975 la dejiyay dad gawaari lagu keenay oo laga soo dejiyay gegida dayuuradaha ee Kismaayo. Si looga fursadao dhibaatadii lagala kulmay dadkii socdaalka dheer soo galay waxaa 22/7/1975 dayuuradihii billabeen in ay ku soo degaan garoon fidsan oo DUJUUMA bartamaheeda laga sameeyay, halkaa oo 163 duulimaad ay dayuuraduhu ku sameeyeen. Dayuuradii ugu duulimaad badnayd waxay DUJUUMA ku soo noqotay 18 jeer, lambarkeeduna wuxuu ahaa 11265, tii ku xigtay waxay sameysay 16 duulimaad, lambarkeeduna wuxuu ahaa 11884.

b) <u>ABAARTII DALKA KU DHACDAY IYO GURMADKII JAAMICIYIINTA</u>

Abaartii haleeshay 8 Gobol oo dalkeenna ka mid ah waxay la-hayd lix weji oo wax qabashadu soo martay:-

1) Roo Ururin - Taa oo ahaydmid aad u dhib badan oo qof walba meeshii guuldarridu ku haleeshay laga soo xambaarayey, meelahaa oo ay ka mid ahaayeenxuduud-beenaadka.

2) Xero-gelin iyo xannaaneyn - Dadka markii la soo ururiyay oo la keenay xeryihii gargaarka waxay u baahnaayeen durbadiina lala gaaray cunto , daawo iyo hooy, waxaana taasi ahayd marxaladdi ugu qallafsanayd ooy abaartu soo ahaatay.

3) Daadgurayn - Isxilqaan gooni ah iyo karti kororsiimo ah bay u baahnayd daadguraynta, waayo boqollaal kun oo qof baa iyagoo cirka iyo dhulkaba lasoo marinayo la doonayay in iyagoo badqaba la geeyo meelihii loo qorsheeyay.

4) Dejin - Markii dadku dayuuradaha ka soo degeen walwalka ugu weyn wuxuu ahaa sidii meel ay deggaan loogu qeeydi lahaa, cuntana loo siin lahaa.

5) Habeyn - Markii dejintii dhamaatay waxaa loo soo jeestay sidii loo dhisi lahaa maamul danwadaag ah oo habeysan, waxaana la curiyay guddiyo ijtimaaci ah oo isku xiran.

6) Hawl-gelin - Waxaa dakii loo hiyikiciyey shaqo si xooggoodu uusan u baylihin ee uu u noqdo mid wax soo saara, miro loo aayana dhala.

Ardada Kulliyadaha Dhaqaalaha iyo Sha ciga waxay si fiican uga qaybgaleen dejintii, habeyntii iyo hal-gelintii. Ardada DUJUUMA hawsha ka heysay waxaa ku dhacaayey culeyskii dejinta kii ugu adkaa, waayo iyagoo aan ka badnayn dadka xarumaha kale deggan waxaa Dujuuma ahayd meesha qur ah oo cirka iyo dhulkaba dadku ka soo degaayeen, waana la garan karaa dhibka lagala kulmayo 50.000 oo qof oo la dejinayo.

Ardada Jaamacaddu iyagoo waday maamulka Dujuuma oo dhan waxay halkaa ka hirgasheen bulsho danwadaag ah, waxayna qotomiyeen mujtamac hantiwadaag ah oo tusaale u noqon kara Soomaaliya oo idil. Waxaa la filayey markii hore in Hantiwadaaggu ka hirgalo magaaloo-yinka waaween kaddibna hoos u soo daadego, hase ahaatee xaalkii waa isbedelay bulshadii aan dooneynay iyo habkii aan rabnay waxay ka unkameen Dujuuma, Kurtunwaareey iyo Sablaale iyo xarumaha kale, taana waxaa keenay intii aqoonta lahayd ee degmooyinka la isugu uru-riyay. Waxaa mudka soo tagnay DUJUUMA [illegible] filan waayo qor walba [illegible] uu hayay wuxuu ku soo wareejiyay Jaalle uu si hagar la'aan ah u tababaray.

j) <u>TIRAKOOB XOG-OGAALNIMO</u>

17kii Agoosto 1975tii waxay si rasmi ahaan ah degmada Dujuuma uga dhamaaday daadgureyntii, sidaa darteed waxaa tallaa-badii u horreysay oo la qaaday ahayd sidii dadka iyo shaqada la

isgu xiri lahaa taa oo aan u arkeynay mid aan suuragal ahayn haddii aan la helin habáyn "Organizzazione".

Taasi waxay keentay in Dujuuma loo qaybiyay 10 Xaafadood oo mid walba 5.000 oo qof ay degganyihiin, xaafadkastan waxaa loo qaybiyay laamo iyo xubno. Waxaa xaafadihii la isugu xiray toban tobanqoys oo qoys walba uu leeyahay guddi 5 qof ka kooban, markaa kaddibna waxaa xaafaddii la isgu xiray boqol qoys.

25kii Agoosto waxaa la sameeyay Tirakoob qorsheysan oo ujeedadiisu ahayd in la ogaado dadka Dujuuma run ahaantii deggan iyo inta beeraley noqon karta, inta dugsileey noqon karta iyo inta yaruuraca ahoo dhabta ~~hoo~~yadoo lagu sido iyo dadka maatada ah.

DADKA DUJUUMA DEGGAN OO U KALA BAXSAN XERADII GARGAARKA IYO CAYNKOODA.

| Xerada Gargaarka | Lab | Dheddig | Dhammaan |
|---|---|---|---|
| GAHA(Waqooyi Galbeed) | 128 | 1 5 | 243 |
| BEER(Togdheer) | 5.300 | 4.535 | 9.835 |
| CAYNABO(Togdheer) | 4.034 | 3.583 | 77.617 |
| HAALA'(Sanaag) | 1.389 | 1.306 | 2.695 |
| BIXIN(Sanaag) | 1.072 | 960 | 2.032 |
| BURAAN(Sanaag) | 523 | 425 | 948 |
| JIIDALI(Sanaag) | 849 | 800 | 1.649 |
| QARDHO(Bari) | 538 | 339 | 877 |
| DALYARE(Nugaal) | 1.634 | 1.568 | 3.202 |
| LIGLE ( " ) | 266 | 251 | 512 |
| XALIN ( " ) | 236 | 181 | 417 |
| XARADHEERE(Mudug) | 1.338 | 1.324 | 2.662 |
| GALDOGOB (( " ) | 1.162 | 847 | 2.009 |
| JEEXAN(Galgaduud) | 4.129 | 3.439 | 7.569 |
| LIBAAXYAALE( " ) | 2.039 | 1.564 | 3.603 |
| XAMAR (Benaadir) | 250 | 259 | 509 |
| SHIMBIROOLE(Bakool) | 526 | 512 | 1.038 |
| CEEL BARDE ( " ) | 45 | 42 | 87 |
| | 25.460 | 22.050 | 47.510 |

Dadka Dujuuma deggan oo aanu u haysannay 50.000 oo qof markii tirakobobku dhammaaday waxay noqdeen 47.510.--; tirakoobka ujeedada u weyn waa midda hoos ku xusan oo dadka da'diisa la kala saarayo:-

| DA' | LAB | DHEDDIG | DHAMMAAN |
|---|---|---|---|
| 0 - 4 | ....... 2.336 | ..... 2.023 | 4.359 |
| 5 - 14 | ....... 11.372 | 9.149 | 20.521 |
| 15-49 | ....... 10.362 | 9.724 | 20.086 |
| 50 - | ....... 1.390 | 1.154 | 2.544 |

<u>Boqolkiiba inta ka timid Gobolladii ay Abaaruhu waxyeelleeyeen</u>

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Gobolka | TOGDHEER | 37% | | Gobolka | W.-galbeed | 0.5% |
| " | GALGUDUUG | 23% | | " | M udug | 9.8% |
| " | SANAAG | 15.3% | -Dujuuma- | " | Nugaal | 8.7% |
| " | BENAADIR | 1.1% | | " | Bakool | 2.3% |
| | | | | " | Bari | 1.8% |

KALFADHIGA 4aad ee AQOONISWEYDAARSIGA ARDADA
Jaamacadda, Kulliyadaha Sharciga iyo Dhaqaa.ha

29kii settember 1975, gelinka hore

Qorayaasha: Jaalle Faaduma Xuseen Cumar
Jaalle Cusmaan Daahir Xaaji Cusmaan.

Kalfadhiga 4aad ee aqoon-isweydaarsiga u socday Ardada Jaamacadda Ummadda, Kulliyadaha Shariiga iyo Dhaqaalaha wuxuu furmay saacaddu markey ahayd 8-45 gelinka hore, waxaana shir guddoomiye ka ahaa Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax, kuxigeenka Guddoomiyaha GSK. Jaalle Kulmiye marka uu caddeeyey in fadhiga uu furan yahay arrinta laga hadlana tahay Kicinta iyo haanuuninta Degmooyinka Bulshada cusub ee Danwadaagta ah.

Hadalka waxaa la siiyey Jaale Muuse Ciise oo Kooxdii kicinta iuo hanuuninta wakiil ka ahaa si uu warbixintooda u qadimo wuxuuna Jaalle Muuse Ciise warbixintii ku muujiyey:

Kicinta iuo Hanuuninta:

Ummad kasta horumarkeeda, hawlgalinteeda iyo ka gacansaraynteeda ay ka leedahay mashaakisha ay dabeecaddu ku keentay waxay ku xiran y ihiin heerka wacyigooda siyaasiga ah iyo garashadoodu ay gaadhsiisantahay. Taas waxaa ku caddeyn kara taarikhdii addunka soo maray iyo dida loogu kala hormaray xagga nolosha oo had iyo jeer daba socday hadba aragtida bulshadu inta ay la'egtahay.

Arrinta ayaa lagama maarmaan ka dhigtay in waddanada horucocodka ahi hanuunintoodu ay ka dhigtaan hubka ugu weyn ee danahooda ku ilaashadaan dadweynahooduna ku hormariyaan, himilooyinkoodana ku gaaraan. Ayadoo ay didaas tahay ayaa mashruucaan beesha danwadaagta ah ahmiyad gaar ah ay u sii leedahay maxaa yeelay waxaan soo daadguraaynay meel isugu keenay dad reer miyi ah, aan wax tacliin ah ama farsama ah oo la sheego lahayn, dhaqan iyo caadooyin kala duwan wata dhibaatooyinkii aqoon darro lahayd ay ku dhan yihiin waxaan isugu keenay dad nin kastaba kelidii tashade ahaa oo qab iyo ma aanaa la ii talinayaa dantiisa oo dhan ay seejinaysay

Waxaan soo uruutinay rag aan weligood ruux dumar ahi talo la wadaagin, ayadoo la simana aanay weli soo hor fariisan (Tusaale: Guddiyadda oo dumarka loo diiday) waxaan Dujuma, Sablaale, Kurtunwaarey iyo danwadaagta Kalluumeysatada ah ku haynaa habarta aaminsan iyada ama inanteeda laba cudur hayaan, ku ruuxaan ah iyo ku caadi ah.

Waxaan nolol cusub u bilaabmay dadka oronaayey maxaa garaamadii daawada lanooga jaray? (waxaan xusuustaa jaalli-

hii qardaasaha dhigi jiray .......). Waxaan soo daadguraynay dad beertuba agtooda ay ceeb iyo foqor ka ahayd oo xoola la'aani ay u tahay nolol la'aan, welina maskaxdooda ay ka ciyaaraan deylo, eyro, iyo giiro.

Waxaan doonaynaa in aan maggaleyno dad taagna habkii ugu horeeyay ee nolosha aadamigu ay soo martay, iyadoo aan ka boodsiinay is addoonsiga, dhulgoosiga iyo hantigoostiga una gudbinay habka hawl iyo hantiwadaag.

Dadka aan soo sheegnay ee aan isla aragnay noloshooda, fikradooda iyo heerka aqoontooda ay taagantahay ayaan doonaynaa in ay tijaabadii u horeysay u noqdaan beesha danwadaagta ah ee beritto.

(Walle Somaaliya iyo kacaankeeda laga yaab!Maxaa tu walba laga warkeenaayaa) Sida dadka noocaas aan soo sheegnay ah ee dhibaatooyinka dabiiciga gaar ka ah lihi ay haysato aan u nabadgelino, ama ay najaxdo tijaabadaas beesha Danwadaagta waxaa lagama maarmaan ah in la siiyo kicin iyo hanuunin joogta ah.

Haddii aan isla aragnay baahida weyn ee loo qabo, su'aasha meesha ku jirta waxay tahay: Waa maxay nooca kicinta iyo hanuuninta ee dadkaas ku haboon? Jawaabtu waxay tahay: maadaama dadka danwadaagta ah ee la dejiyay dhaqan ahaan iyo dhaqaala ahaan ay ka duwan yihiin dadka deggan magaalooyinka kale ujeedada laga leeyahayna bilowgii bulshada cusub ee hantiwadaag ah, waxaa loo baahanyahay in kicintooda iyo hanuunintooda si gaar ah loo qorsheeyaa loona isticmaalo tabo iyo xeelado loogu talagalay.Taas waxaan ula jeedaa, ayadoo beesha danwadaagta ahi u habeysan tahay qoysayn iyo wixii la halmaala, kana duwantahay nidaamka lagu maamulo degmooyinka kale ee waddanka, waxaa khasab noqonaya in kicintooda iyo hanuunintooda lagu aadiyo nidaamka qorshaynta.

Way yartahay haddii ay jirtaba, in goloyaasha hanuuninta ee jamar looga hadlo barnaamij dheer oo ku saabsan sida loo isticmaalo, ama sida caafimaadka iyo nadaafadda guud loo ilaaliyo duruus ku saabsan arimahaas.

Midda kale ee la hilmaami karin waxay tahay in dadkaasi ay halis u yihiin afmiishaarada. Waxaan ogaanay in ruusa dantooda ka talinaaya iyo dawgalkooda ka talinaaya ayan u wadajirin, oo wixii loo sheegaba ay qaadan ogyihiin ayagoo had iyo jeer kuugu maahmaahaya: " Muslimoow run sheeg muslimoowna run uga qaado. "

Kolka aan tixgelino sababaha aan soo sheegnay oo dhan iyo dhibaatooyinka danwadaagta haystaa, waxaan ku soo gabagabayn karna in Beelahaasi kicin iyo hanuunin u gaar ah sida cunnada ay ugu baahanyihiin .

III - Ardada Jaamacadda iyo qaybtii ay ka qaateen kicinta iyo hanuuninta: aad ayeey ardada Jaamacaddu kicinta iyo

hanuuninta dadweynaha qayb wacan uga qaateen; ha noqdaan kuwii uxilsaarnaa hawshaa iyada ah hase noqdeen jaallayaashi kale ee hawsha kala gedisan ka hayey xaafadda. Ar.ada Jaamacadda giddigood waxaa loo yaqaanay macalimiin, magacaa oo ay kula baxeen ayadoo ardayga hawshiisa u gaarka ahi wax kastaba ha ahaatee uu markastaaba bare iyo hanuuniye ahaa. Haddi aan wax yar ka taa taabto hawlaha la xiriira kicinta iyo hanuuninta ee ardada Jamacaddu ay qabatay degmooyinka cusub waxaa ka mid ahaa:

1 - Dhisma golayaal hanuunin oo ku habeysan xubin-xubin , laan-laan, xaafad-xaadad iyo degmo guud ahaan.

2 - Qaban qaabin iyo fulin barnaamijyo guud iyo kuwa gaar ahaaneed oo la xiriira:

   b - nadaafadda guud

   t - hawl galin iyo shaqa jeclaysiin, hal qabsiguna ahaa " Nimaan shaqaysan shaah wa ka xaaraan"ayaguna ay noogu jiibinayeen " Aanaa feeydan ee waxba ay farin".

3 - Abuuris guddiya maamul iyo kuwo ijtimaaciah oo ku habaysan nidaamka qoysaynta sida: Guddiga dhexe ee maamulka ka Hooyooyinka, ka guulwadayaasha iyo kan dhalinyaradda , guddiyadaas dhamaantood waxaa loo furay tababarro maamulka iyo siyaasadda ku saabsan. Duruusta waxaa diyaarinteeda iyo bixinteedaba lahaa Jaamiciyiinta, ayadoo had iyo jeer aan la kaashanaypay X.S.M.G.S.K.

   Guddiyadaasi waxay dhammaan si toos ah ugu xidhnaayeen X.S.M.G.S.K. Waxaan kale oo tababarro khaas ah loo furay guddiyaal kale oo ay ka mid yihiin: Guddiga dhex dhexaadinta qoyska, guddiga hanuuninta, guddiga cayaaraha iyo guddiga garsoorka dadweynaha. Kaalin weyn waxaa ka geystay kicinta iyo hanuuninta beesha danwadaagta ah barnaamijyada xiisaha lahaa ee ardada jaamacaddu u soo habeysay, barnaamijyadaa waxaa ka mid ahaa: tartana xagga suugaanta, dhaqanka iyo hiddaha, heesaha hirgalay, gabayada hirgalay,cayaaraha hiddaha iyo dhaqanka, xarig jiid iyo wixii soo raaca. Tagtiiganagu wuxuu ahaa tartan gelin iyo durbaan.

4 - Kicinta iyo hanuuninta intee ayeey wax ka tartay dhibaatooyinki meesha yaalay! Runtii farxad wayn waxaa noo ahayd muddo gaaban in ku siman ayaa dadweynihii uga qayb qaatay hanuuninta, ayagoo ahmiyad gaar ah siinaaya, fahmayana sida ummadda Soomaaliyeed iyo kacaankeenu uu gurmaday. Taasi waxay ka muuqanaysey shucuurtooda, gabayada iyo heesaha ay tirinaayaan iyo ayaga dhexdooda sida ay isku waaninaayeen.

(Illoen dawlad islaan ah oo dilkii iyo dhicii iyo dulmigii ka dhamaadayd waxay doonto ma weydo, dur bana u sahlanaa!) Waxaa kaloo tilmaan u ahaa sida ay u wada shaqaynaayeen uguna kala dambeynaayeen inta badan, waxaana ka markhaati kacaayaa iyagoo muddo gaaban kula wareegay, oo wadi jiray hawlo badan. Xagga ka qayb galka shaqada, kicinta iyo hanuuninta, waxa wayn ayey ka tartay oo maradii guryaha aktooda la dooyeeysanaayey iyo shaxdii waa yaraadeen. Kolkaa waxaan dhihi karnaa baahidii dad kaas u qabeen kicinta iyo hanuuninta maalinba maalin ka ka dambeeya ayeey sii siyaadeysey.

<u>Dhibaatooyinka jirey iyo talooyin.</u>

Xagga dhibaatooyinka kicinta iyo hanuuninta :

1 - Qalabka warka lagu fidiyo oo yaraa (microfoonadda, naastroyinka).
2 - Sawiradda, Tusaalooyinka, propagaandada oo yaraa.
3 - X. S.M.G.S.K. oo aan dad ku filan haysan - iyaado ardaydii maamulaysay ka timid.
4 - Iyadoo aan markii la diyaarin casharadda loogu talagalay beesha danwadaagta ah.
5 - Xeerka Qoyska oo aan weli hirgalin.

<u>Talooyin:</u>

1 - In si deg deg ah loo geeyo qalabka kicinta iyo hanuuninta ee looga baahanyahay;
2 - in shaqaale ku filan oo X.S.M.G.S.K. loo diro;
3 - in si degdeg ah loo geeyo casharadda ku saabsan beesha danwadaagta;
4 - in wax laga qabto furiinka oo batay;
5 - in laga fiirsado filimadda iyo riwaayadaha loo geeynayo, loona xulo.
6 - macnaha magaaladda waa in si fiican looga dhaadhiciyaa lana baraa;
7 - waa in shaqaalaha loo diraayo loo xulaa;
8 - in dhammaan golayaasha hanuuninta magaalada Xamar laga siidaayo waaya aragnimadii ardada Jaamacadda;
9 - in magacyada naxdinta leh laga daayo sida: caydha, dadka tabaaleysan, dadka dhamaadayd maalkoodu( ma dhammaan maalkoodu);
10 - in sidii suurta gal ah loo soo tuso beeraha (Crash Program );
11 - in la abaabulo ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka(folklor dance);
12 - in hanuunintu u badnaato ku dhex jir iyo la shaqayn;
13 - in la ilaaliyo wixii bulshada kharibaaya;
14 - in gudiyadooda booqasho loo sameeyo si ay u qorodho waayaaragnimadooda;

15 - X.S.M.G.S.K. Waa inuu ku dadaalaa sidii uu ugu a diri lahaa beelaha danwadaagta ah calamadda urura da ijtimaaciga ah;

16 - in shaqaalaha X.S.M.G.S.K. uu u diyaariyo degmooyinka bulshada danwadaagta ah ay noqdaan kuwa aqoon ballaaran u leh dhaqanka bulshada miyiga, dad aqoon wanaagsan u leh diinta islaanka iyo aftahannimo ay ku soo jiidikaraan dadweynaha.

Maamulka bulshada beeraleyda iyo kaluumeysatada cusub waa mid dhammaan hawlihii laga hayey degmooyinkaas, waana mid u hirgaley sidii habbooneyd oo loogu talo galay loona qorsheeyay. Dadka la dejiyey degmooyinka Kurtunwaarey, Sablaale iyo Dujuuma waxaa tiradoodu dhan tahay : 103.128 qof. Markii dadkaas la dejinayey waxaa ugu horentii gacanta ku qabanayey guddiga tirakoobka oo markii ay bogtaan hawshooda ku saabsan tirinta, kala soocidda rag iyo dumar, waaweyn iyo yaryar, u gudbinayeen guddiga caafimaadka oo kaalmo degdeg ah gaarsiinayey qofkii caafimaadkiisu xumaadey intuu safarka ku jirey amase horeyba u jirana. Kaddibna waxaa xilka dadka la wareegi jirey guddiga cuntada oo si degdeg ah ugu qaybin jirey cunto bisil.

Markii hawlahaasu dhammaadaan waxaa lagu dhaqaaqi jirey sidii dadka aqalka wata loogu dhisi lahaa, kuwa kalana loogu dhisi lahaa waab si hagaagsan loogu qurxiyey caws iyo bac. Tillaabada kale oo ku xigtey hawshaas waxay ahayd in dadka loo kala qaybiyo xaafado lagana dhiso dhex dooda guddiyo kala duwan si shaqadu ugu fududaato.

## GUDDIYADA

Degmo kasta waxay leedahay guddiga kacaanka ee degmada waxayna ka kooban tahay dhowr xaafadood. Xaafad kastana waxay leedahay guddi lagu magacaabo Guddiga Xaafadda oo ka kooban dad ka tirsan laamaha kala duwan ee xaafaddaas. Xaafad kasta waxay u qaybsan tahay dhowr laamood, laan kastana waxay leedahay guddi u gaar ah laguna magacaabo Guddiga Laanta. Laan kasta oo ka mid ah xaafadaha waxaa loo qaybiyay dhowr xubnood amase boqol-boqol qoys oo uu horjooge u yahay qof lagu magacaabo bocoltiriye, waxayna leeyihiin guddi u gaar ah. Boqolkii qoysba waxaa loo sii qaybiyey toban-toban qoys waxayna leeyihiin guddi u gaar ah, waxaana madax u ah nin lagu magacaabo tobantiriye. Guddi kasta oo ka mid ah guddiyada aan soo tilmaaney waxaa la fuliya hawsha ugana hooseeya shaqada guddiyo ijtimaaci ah sida guddiga hoyooyinka, kan dhallinyarada iyo kan shaqaalaha. Go'aannada ka soo baxa guddiga kacaanka ee Degmada waxay toos u soo gaarayaan guddiga xaafadda oo xil ka saaran yahay in ay u gudbiyaan guddiyada ka hooseeya kuna dadaalaan sidii ay u fuli lahaayeen, isla markaasna u soo gudbiyaan Guddiga Kacaanka ee Degmada dhibaato kasta oo ka hortimaada fulinta go'aannadaas.

GUDDIGA RAASHIINQAYBINTA

Habkii lagu dhaqmi jiray markii la joogay xerooyinka gargaarka oo ahaa dadka oo meel wax loogu wada kariyo,raashin bisilna la siiyo, waxaa lagu beddelay hab la kowsaday xerooyinka dejinta oo ah qoys walba raashinkiisa gaar in loo siiyo.

Habka wuxuu keeney in Guddi ka tirsan Ardayda loo xilsaaro qaybinta iyo gaarsiinta raashinka laga soo qaaday makhaasiinada dadweynaha la dejiyay.

Guddiga raashinka hawshiisa waxay ahayd in dadka uu usameeyo buugag raashinka ay ku qaataan oo laga naqliyay kaararkii ay la soo degeen, iyo raashin qaybiska oo ay maamulaan.

Marxalado dhowr ah ayaa la soo maray. Ayaamihii hore Guddiga wuxuu cuntada ku qaybin jiray agagaarka makhaasiinada, wuxuuna bixinaayay raashin labalaba madmood. Markii ay dadku soo bateen, suurta gal ma noqon in dad farahaa leh ay isa soo tubaan magaaalada dhexdeeda. Sidaas awgeed, Guddigu wuxuu go'aan ku gaaray in raashinka lagu bixiyo xaafadaha dhexdooda isagoo xaafad kastaba u qaybiyay dhowr meelood ama rugo la magac baxay geedo, geed kastana waxaa raashin ka qaadanaayay 70 ilaa 100 qoys, waxaana mas'uul ka ahaa hal ama laba arday.

Raashin qaybintu aad ayay u dhibaato badnayd. Ayaamihii hore kontrool sidaas u xoog badan ma uusan jirin. Muddo dabadeed, markii ay dadka badidoodu la dejiyay, waxaa go'aan lagu gaaray in kontroolka la xoojiyo oo raashin iska bixiaan loo dhiibin. Dhinacaa waxaa gacan weyn ka gaystay Guddigii Jaamiciinta ka tirsanaa oo loo magacaabay in ay la wareegaan, habeeyaanna maamulka xisaabaadka iyo makhaasiinada.

Waxaa intaa noo dheeraa in dadku, abaartii dheereed oo ay soo mareen awgeed, markastaa ay shaki iyo murug ay ku haysay cuntada, qofkastana ku dadaali jiray wax kororso. Si dadka kalsooni iyo qanaaco loo galiyo, guddigu hawl hanuunis oo weyn ayuu ka gaystay, waxaana mahad leh in natiijo wanaagsan laga gaaray ayaamihii dambana aad ayay u yaraadeen dadka cuntada ku dooda.

Markii u soo dhowaaday dhamaadkii joogitaanka ardayda jaamacadda, waxaa la gaaray in tababaro loo furo toban tiirayaasha si ay ula waregaan shaqadii ardadu haysay. Tababarkaasu wuxuu ku koobnaa xisaab, habka kaydinta cuntada, habka diyaarinta cuntada iyo qaybintiisa, iyo habka wax miisaamidda.

## XISAABAADKA IYO KORMEERKOODA

Markii ardada jaamacadda tagtey xarumaha kala duwan oo la dej iyay bulshada cusub ee beeraleyda, ma uusan jirin wax nidaam ah oo si hagaagsan u tilmaami kara sida loo dhawrayo, loo qaybiyo amase loo xisaabiyo maalka badan ee Dawladdu geenaysay degmooyinkaas. Arrintaasuna waxay dhalisay qas, tuhmo iyo xoolaha oo kala socon waayay, sababtoo ah in qof kasta oo aan nadiif ahayn doonayay sidii uu wax ku bursan lahaa. Si looga hortago buuqaas waxaa ardadu habaysay nidaam xisaabayd oo si qoto dheer loo qorsheeyay. Makhaasiinada oo dhan waxaa loo xilsaaray ardada jaamiciinta ah oo ay kalkaalayaal ka dhigteen ardayda shaqada qaranka kuwaasoo loo si carbiyay sidii ay xilkaas ula wareegi lahaayeen. Ardada shaqada qaranka iyaguna markooda waxay u tababari doonaan hawshaas dad ka mid ah bulshada cusub ee beeraleyda. Si loo dhawro nidaamka ardadu u qorshaysay xisaabaadka waxaa la sameeyay xubin katirsan guddiga xisaabaadka oo qaabilsan kormeerka guud.

Hawsha waxaa loo habeeyay si toban tiriye kast toos uga qaato makhaasiinada cuntada looga tala galay tobankiisa qoys. Laba beri ka hor maalinta laantiisu raashinka qaadanayso, ayaa toban tiriye kasta u keenayaa baldaajaha laanta tirada dadka tobankiisa qoys kaasoo markiisa asna u sii gudbinaya xafiiska xisaabaadka ee tirada laantiisa oo dhan, iyada oo tobankiiba qoys ku hor qoran yahay magaca toban tiriyaha. Baldaajaha laantu dabadeed wuxuu kayd hayaha ula tegeyaa warqaddaas oo ay ku lifaaqan yihiin modelayaashii toban tireyaasha ku taxnaayeen si mid kasta ugu dambaystii halkaas uga qaato raashinkiisa. Laan kasta waxay toddobaadkii raashin qaadataa hal mar, qofkastana waxaa u qoran raashinka soo socda:

1 - Sareenka 300/GR, Bariiska 250/GR.
2 - Saliida iyo Timirta midkiiba 30/GR.
3 - Sonkorta 50/GR.
4 - Caleenta shaaha 3 GR.
5 - Caanaha 20 GR.

## GUDDIGA GARSOORKA

Degmooyinka cusub intii aan la dejin dadka, waxaa dadku arrimahooda ku dhamaysan jireen xeer somali iyo is-afgarad dhexdooda ah, haddii arrintu cuslaatana waxaa loo gudbin jiray laguna dhammayn jiray Maxkamadda Degmada iyo kuwa ka sareeya. Markii degmooyinka la soo dejiyay beeraleyda cusub, waxaa ardadu ku bilaabeen kanuunis iyo in ay arrimahooda ku dhammaystaan si af-garad iyo jaallenimmo. Inkastoo ardadu ku guuleysteen in beeraleyda cusub ka hortagaan dhibaato

kasta oo la soo gudboonaata haddana waxaa lagama maarmaan noqotay in la aasaaso guddi ka mid ah ardada oo loo xilsaaray in ay dhammeyaan.

Dhibaato kasta waxay marka hore soo martaa toban tiriyaha, boqol tiriyaha, Guddiga laanta, Guddiga Xaafadda, ugu dambaystana waxay arrintii cuslaata u soo gudubtaa Guddiga Garsoorka oo ka gaara go'aan ugu dambays ah. Guddiga Garsoorka wuxuu fulin jiray hawshiisa marku dhagaysto tala da dhammaan guddiyaasha ku shaqo leh arrintaas. Dacwadii uu dhammeeyo Guddiga Garsoorka waxay ahayd mid aan dadku dood ka keeni ee ay u hogaansan yihiin. Dambiyada ka dhaca degmooyinkaas aad bay u yar yihiin, waxaana laga tilmaami karaa tuugada yar yar, amardiido iyo arrimaha qoyska. Markii u soo dhowaaday waqtigii ardadu laabanaysay ayaa dad ka mid ah dadweynaha loo tababaray in ay wadaan xilkii garsoorka iyo dhexdhexaadinta.

DHIBAATOOYINKA IYO TALOOYIN

Waxaa dadweynahu ka cabanayaa arrad, maacuun la'aan, biyo yaraan, cusbio la'aan, gaadiid yaraan, alaabada dhismaha oo ku yar, miisaan la'aan iyo waxyaalo kale oo yar yar. Sida awgeed, waxaan soo jeedinaynaa in arrimahaas wax laga qabto intii la awoodi karo. Xagga gaadiidka, waxaan talo ku soo jeedinaynaa in haddii aan loo heli karin baabuur ku filan la siiyo gaari dameero si ay ugu fududaato shaqadooda. Si ay ku yaraato dhibaatada cunta qaybinta iyo badbaadinta raashinka, waxaan ku talinaynaa in la dhiso bakhaaro badan, la geeyana miisaano intii la awoodi karo. Waxaa kale oo aan talo ku soo jeedinaynaa in xoogga beeraleyda laga saaro dadka waayeelka ah, curyaamada iyo dhamaan kuwa aan wax ka tari karin xagga beeraha, iyaga oo la barayo xirfad iyo meherad ay wax ka dhali karaan.

Waxaan talo ku soo jeedinaynaa in Wasaarad kasta iyo Waxaalad kasta u geeyaan degmooyinka cusub shaqaalihii looga baahnaa deg degna u qabsadaan hawlahooda. Waxaan kale in dadweynaha laga ilaaliyo cuntada qasacadaha oo waqtigoodi dhacay, cuntadii ku jirtana is-beddeshay. Waxaan soo jeedinaynaa in haddii la awoodi karo dadka la siiyo saabuun ay ku dhaqdaan dharka.

## TALOOYINKA KU SAABSAN MAAMULKA BULSHADA

1 - Inta la awoodi karo in dadweynaha laga baahi tiro xagga dharka, arrintaas oo keentay in aan qaarkood guryaha ka soo bixin arrad awgiis;

2 - waxaa kale oo dadku ugu baahan yahay inay helaan maacuun ay wax ku karsadaan, kuna qaybsadaan iyo in la siiyo qalab dhismaha sida garweyn, badeel, gudun iwm.;

3 - in dadka ay helaan saabuunta dharka iyo cusbada;

4 - in Wasaaradaha iyo Wakaaladaha ku shaqo leh ay ka dhisaan degmooyinka cusub: bakhaarada cuntada si looga badbaadiyo dhibaatada ka imaan karta xagga dabeecadda;

5 - in la kordhiyo ceelasha si dadku u heloan biyo ku filan iyo in la siyaadiyo milsaamada si looga kaaftoomo dhibaatada xagga qaybinta cuntada;

6 - in dadka xagga beeraha wax ka tari karin la baro xirfo iyo mehrad oo wax ay ku soo saari karaan si ay dulsaar ku noqon dadka ama bulshada inteeda kale;

7 - xagga gaadiidka, iyadoo la tixgelinaayo dhibaatada aaddunka ka taagan xagga dhaqaalaha iyo ascaarta hadba kordheysa, in loo sameeyo degmooyinka cusub gaadiidka fudud oo ay ku qabsadaan hawlaha yaryar, sida nadaafadda xaafadaha, gurista, dhismaha yaryar iwm.;

8 - in dib loo habeeyo nidaamka raashin qaybinta xaafadaha si suurta gelineysa in xoog badan ee raashinka qaada ama qaybiya raashinku la harin sida haatan dhacda;

9 - in la mideeyo nidaamka guddiyada maamula degmooyinka danwadaagta beeraleyda oo haatan kala duwan.

## KALFADHIGA 5AAD EE AQOON-ISWEYDAARSIGA JAAMACADDA UMMADDA SOOMAALIYEED

## LAAMAHA SHARCIGA IYO DHAQAALAHA

(28KA ILAA 30KA SETTEMBER 1975)

## WARBIXINTA WAXBARASHADA DEGMOOYINKA CUSUB EE BULSHADA DANWADAAGTA

Guddiga loo bixiyay inay ka soo hadlaan waxbarashada, markii ay waxbadan falanqeeyeen xaaladda ku saabsan waxbarashada bulshada danwadaagta beeraleyda ah waxay isla garteen in warbixinta loo kala qaybiyo saddex qaybo oo kala ah:

B) WAXBARASHADA GUUD AHAANEED;

T) DHIBAATOOYINKA WAXBARASHADA;

J) SIDA UGU SAHLAN OO LAGU XALLIN KARO MASHAAKISHA WAXBARASHADA.

Waxaan madaxda sharafta leh aannu u sheegaynaa in ardayda ay ka soo baxday arrintii loo xil saaray oo ka koobneyd: raridda iyo dejinta dadka soomaaliyeed ee abaartii dabadheer ahayd ay tabaaleysay, guud ahaan, gaar ahaanna dhanka waxbarashada.

- Dhammaan degmooyinka Beeraleyda ah waxay bilaabatay waxbarashada waqtiyo isu dhaw-dhaw;
- waxbarasho habeysan ma jirin ka hor ardayda jaamiciinta ah;
- tacliinta ardada waa ay kala duwaneyd. Qaarkood waxay ka soo faa'iideysteen OHRM, intooda badnaa ma ayan aqoonin qorista iyo akhriska;
- kooxda Jaamiciinta ah oo loo xilsaaray waxbarashada ayaga oo wata shaqadii waxbarashada ayay qayb libaax ka qaadan jireen shaqooyinkii kale oo xerooyinka ka socday;
- waxay suurta geliyeen inay furaan ama in ay u furaan dhammaan caruurta gaadahy da'da dugsiyada (6-14) (7-14), arday dhan ; 45.171, ardaydaas waxay wax ku baran jireen goobo loo habeeyay ama dhirta hoosteeda (classe);
- inkastoo ay jireen arday heerka tacliintooda kala sarreesay ama shahaado wadatay, haddana tacliinta waxaa lagu habeeyay dugsiyada hoose;
- waxaa nasiib wanaag ah in ardayda ay maanta waxna qori karaan, waxna akhrin karaan;

...

- maanta waxaa ku faan leh in tacliinta la soo gaarsiiyay heer la dhihi karo waa caadi. Wax waliba sidii loogu talo galay a yay u socdaan;
- si ay dugsiyada u socdaan, marka aan tagno ama ka soo laaban no degmooyinka, waxaan tababaarnay macallimiin ku meel gaar ah oo dhan 500 bare isugeynta saddexda degmo;
- Tirakoobta fasallada aan habeynay waxay gaarayaan 801 fasal.

Intaas waxaa ku dhan qorshaha tacliinta caadiga ah (istruzione formale).

Qorsha labaad wuxuu la xiriiraa waxbarashada dadka waa weyn. Maadaama ay noo suura gal noqon karin in la furo waxbarashada dadka waaweyn, waxaa lagama maarmaan noqotay in si waqtiga yar looga faa'iideeysto la furo tababar gaaban. Tababarradaas waxaa ka mid ah:

- tababarka beeraha, garsoorka, caafimaadka, farsamayaqaannada iyo tababarka guddiyada ijtimaaciga ah.

## DHIBAATOOYINKA TACLIINTA

1) Inuusan jirin dhismo dugsi u habeysan, caruurta lagu hayn karo;
2) Macallin la'aan oo ardada u faa'iideyn doonto, ama awood u leh waxbaridda caruurta, inta loo tababarayna aanay wax sidaas u qiimo leh ku kordhin karin aqoonta ardada;
3) qalabka waxbarashada oo aad u yar (buugag, sabuurado, qalabka tusaaleynta, kutub, iwm.);
4) arad xumada ardayda haysata (giddigood waxay fasallada yimaadaan iyagoo fesro qaawan, halisna waxay u yihiin cudurro, gaar ahaan qufaca noocyadiisa badan).

## TALOOYIN

Si lagu xalliyo dhibaatooyinka, Guddiga Waxbarashada wuxuu gartay in laga qaado tillaabooyinka hoos ku qoran:

- in degdeg loo dhiso dugsiyo ku filan beelaha danwadaagta beeraleyda;
- in si degdeg ah loogu diro macallimiin beelahaas, iyadoo gaar ahaan aannu tilmaameyno in la dedejiyo tababarka haatan u socda ardaydii ka soo baxday Dugsiyada Sare oo shaqada qaranka halkaa ay ka gutaan;
- in laga haqatiro qalabka waxbarashada;

...

- in laga dhiso degmooyinkaas dugsiyada la seexdo (collegio); laguna barto cilmiga beeraha;
- in dadka farsamayaqaannada loo furo tababaro gaagaaban;
- in laga furo degmooyinkaas dugsiga dhaqaalaha guriga;
- in la joogteeyo waxbarashada dadka waaweyn;
- in si dhaqso ah looga furo dugsiga dhexe, waayo waxaa jira arday badan oo haysta shahaadooyinka dugsiyada hoose iyo kuwa kale.

---

## XANNAANADA CARUURTA

Intaas waxaa dheer in xeryaha qaarkood laga hirgeliyay dugsiyada xannaanada caruurta, taasoo awood u siisay in ay maanta shaqaalaha bulshada cusub ay aadi karaan shaqooyinkooda iyagoo aan ka walwalin caruurtooda. Dugsiyada waxaa loogu talo galay caruurta da'doodu tahay 5 sano iyo wixii ka yar, tiradooduna waxay gaareysaa kumayaal.

Guddiga Ardayda Jaamiciinta ah oo u qaabilsan dhanka waxbarashada waxay oraahdoodi ku soo gababaynayaan in kooxdii loo xilsaaray waxbarashada muddadii yarayd ee la joogay degmooyinka cusub ay waajibkoodii si wacan uga soo baxeen.

GUDDIGA WAXBARASHADA ARDADA
(Ciise Cali Maxamed)

(Cabdullaahi Suldaan Axmad)

(Yuusuf Xasan Cali)

---

## TALOOYINKII AY KU KORDHIYEEN ARDADA WARBIXINTA GUDDIGA

**Jaalle Maryan Cariif:** in waxbarashada ardada beelaha cusub eedanwadaagta beeraleyda ah loogu daro maadooyinka dugsiyada dhexe wixii ka billawda cilmiga beeraha, mar haddii bulshadaas loogu talo galay inay beeraley noqdaan.

**Jaalle Cabdullaahi Suldaan:** in ardada waxbarashadooda ay gaarsiisan tahay heerka dugsiga sare Dawladdu ugu deeqdo ama ay geyso "kollejooyinka" si ay u dhammeeystaan tacliintooda.

...

**Jaalle Maxamad Sheekh Cusmaan:** si loo helo tababar degdeg ah oo gaarsiisan heer sare waxaa loo baahan yahay in Wasaaradaha iyo Wakaaladaha arrimaha tababarrada farsamayaqaannada khuseysa ay u qorsheeyaan, una dejiyaan degmooyinka cusub ee danwadaagta ah barnaamij tababarreed xagga farsamayaqaannada oo si adag loo hirgeliyaa, qalabkii tababarka loo geeyaa degmo kasta, halkii degmo kasta tababarrada sida ay hadba la noqoto ama ay ka fursan waayaan ay ugu dhaqaaqi lahaayeen.

## Warbixinta Caafimaadka Degmooyinka Cusub ee Bulshada Danwadaagta

Caafimaadku waxaa weeye asaaska noloshada bani-aadamka, waana shay aan marnaba laga maarmi karin. Ummaddu haddii ay rabto inay gaarto horumar buuxa waa inay fiiro gaar ah u lahaataa caafimaadka dadkeeda. Qofkii aan caafimaad qabin marka ugu horreysa nolo-shiisu ma fiicna; marka labaadna waxba uma taro kamana qaybgali karo horumarka waddankiisa iyo halganka bulshada uu ku dhex nool-yahay.

Ardayda Sharciga iyo Dhaqaalaha waxay ka mid ahaayeen arday-dii ka gurmatay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed. Markii ay gaa-reen Degmooyinka la dejinayo beesha danwadaagta Beeraleyda waxay ka qayb qaateen hawlihii banaa ee dejinta iyo taakuleynta walaa-lahood. Ardaydaas waxay ka kala socdeen wasaaradaha iyo wakaala-daha. Sidaa darteed arday kastaba wuxuu ka shaqeynayay shaqadii uu ka hayay wasaaraddiisa ama wakaaladiisa. Waxaa ka mid ahaa arday ka socday wasaaradda Caafimaadka, gacanna ka geystay sida ardayda kale, kuna biiray maamulka dadka ka shaqeynayay caafimaad-ka. Dadka shaqadoodu ay ahayd Caafimaadka aad bay u yaraayeen, waxayna ahaayeen:-

| | K/Waarey | Sablaale | Dujuuma |
|---|---|---|---|
| Takhaatiir | 3 | 3 | 4 |
| Kalkaaliye | 18 | 3 | 13 |
| Ummuliso | 2 | 2 | 2 |
| Bisha Cas | 65 | 45 | 45 |
| Gargaarka | 120 | 160 | 180 |
| Cuntada Deg. | 6 | 14 | 16 |
| Ardayda | 24 | 13 | 25 |
| Faydhowrka | 2 | 2 | 2 |
| Duumada | 1 | 1 | 1 |
| Kaaliye Hoose | - | 4 | - |
| Sheybaar | - | 1 | 1 |
| Tallaalka | - | - | 3 |
| Tiro guud... | 241 | 235 | 292 |

Dadkaas inkasta ooy yaraayeen marka loo fiiriyo dadka Deg-mooyinkaas ku nool, haddana way gudan jireen shaqadooda.
Dhibaatooyinka xagga Caafimaadka Degmooyinkaas ka haystay intay ardaydu tegin waxay ahaayeen:-

1) Nadaafadda guud oo xumeed oo ay uguna wacnayd musqulo la'aanta.
2) Shaqaalaha oo aad u yaraa
3) Isbitaal iyo Bukaansocod oo aan jirin
4) Qalabka caafimaadka oo yaraa, daawada iwm.
5) Baraarujinta aan jirinba

/./

Inkastooy dhibaatooyinkaasi jireen, haddan daawada taalay dadka si wanaagsan ayay u gaari jirtay.
Haba yaraatee wax cudurradda faafa ahna ka ma dillaacin.
Cudurrada ugu badan Degmooyinka waxay ahaayeen:-

1) Qufac oo isgu jira Jix, Qaaxo, Bronkiite, Bertosse iwm.
2) Daaf ama Bakooro oo u badan carruurta
3) Shuban
4) Dhiig-yari iyo itaal-darro
5) Jaqoofeey (P.tropicale)
6) Qaamabuur iyo Hablabaas
7) Duumo

Markii dadkii soo batay, caafimaadkiina hoos buu u dhacay, roob badanna da'ay, dadkuna uu aad u tabaaleysnaa markiisii horaba, dhibaatooyinna kaga yimaadeen xagga isbeddelka hawada, ayaa shaqadii loo beddelay tab kale oo waxaa la suubiyay guddiyo fara badan kana kooban:
1) Guddiga hanuuninta iyo baraarujinta caafimaadka guud
2) Guddigga tababarka oo tababaray dad tiradoodu gaareyso 250 oo Kurtunwaarey ah, 160 Sablaale ah iyo 120 Dujuuma ah.
3) Guddiga Kormeerka nadaafadda guryaha iyo agagaarka
4) Guddiga Daryeelka caafimaadka guud iyo ka hor-teggidda cudurrada (Kiniini qaybinta, daawada ceelka iyo musqulaha)
5) Guddiga daaweynta oo la shaqeynjiray takhaatiirta.

Kaddib waxaa la suubiyay Isbitaal dadka lagu uruursho iyo bukaansocod laan kastaba. Isbitaallada degmooyinka waxay u qaybsamaan 4(afar) meelood oo kala ah:-
1)Qaybta cudurrada laysku daarto
2) Qaybta Cudurrada guud
3) Qaybta Qaaxada
4) Qaybta xannanada carruurta iyo ummulaha.

Sida runta ah maalinba maalinta ka dambeysa caafimaadka dadka aad buu u soo fiicnaanaayey, waxaana lagu qiyaasi karaa dhalashadii iyo dhimashadii oo isku soo dhowaaday, iyada oo cuduroo khatar ah ayna ka dillaacin.
Daawo qeybinta ka sokow laamaha waxaa la siinayay nafaqo loogu talagalay dadka naashifka ah, ilmaha, duqowda iyo ummulaha.
Isbitaalka dadka ku jira waxaa la siiyaa raashin dheeraad ah.
Haddaba, dhibaatooy nka ugu waaweyn oo :ı in wax la qabto u baahan waxay kala yihiin:-

1) In la sameeyo Isbitaalo rasmi ah oo sariiro leh
2) Raajo in la geeyo si lagu kala saaro dadka buka iyo dadka fayoow
3) In takhaatiir Specialisti ah la geeyo gaar ahaan kuwa wax qafa iyo kuwa cuduradda caweynka
4) In kormeer takhaatiir loo diraa oo ay soo wadaan dadka qaba cudurro aan meeshaas waxba lagaga qaban karin, sida dadka waasha.
5) In musqulaha laga beddelo habka ay hadda u dhisanyihiin (meeshii laanta in tobankii qoysba mid loo dhiso)
6) In la dedejiyo guryaha dhismahooda si aan roobku khatar u gelin hoosna uusan u dhigin dadka caafimaadkooda, siiba carruurta,lana sii hormariyo bacda guryaha dushooda la saaro si ay roobka uga sii celiso.
7) In Joqofeyda olole lagu qaado intii ayan curyaaminin dadka ka shaqeyn lahaa beeraha iyo dhismaha, arrintaas oo ka daran kuwii aanu horay u soo sheegnay.
8) Waxaa kale oo jirta in dadkaasi uu daawada u hayso raashin oo kale, isla markaasna ay maalin walba dad fara badan safka u galaan daawada si ay uga dhuuntaan shaqada, iyagoon citiqaadsanayn in kiniinigu yahay daawo.
9) In faynuusyo la siiyo si ay isaga jiraan bahallada yaryar ee guryaha ku soo dhuunto, sida maska iyo wax la mid ah.
10) In wax laga qabto cunnadda badan ee nooca raashinka ku jira gasacadaha ah ee bakhaarada siday u dhextaallo waqtigoodii dhamaaday, taasoo caafimaadkii dadka iyo dhaqaalihii dikaba dhibaatayneysa.

**KALFADHIGA 3AAD EE AQOON-ISWEYDAARSIGA JAAMACADDA UMMADDA SOOMAALIYEED LAAMAHA SHARCIGA IYO DHAQAALAHA**

( 28ka Setember 1975 - gelinka dambe)

Qorayaasha: Jaalle Maxamed Shekh Cusmaan "Jawaari" iyo
Jaalle Cali Xaaji

Kalfadhiga 3aad ee aqoon-isweydaarsiga u socday ardada Jaamacadda, kulliyada Sharciga iyo Dhaqaalaha wuxuu furmay saacaddu markay ahayd 8,45 gelinka dambe waxaana shir Guddoomiye ka ahaa Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax, Madaxweyne ku xigeenka Golaha Sare ee Kacaanka, ahna Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha GSK. Jaalle Xuseen Kulmiye oo shirka furay wuxuu arar gaaban ku xiriiriyay wadahadalkii kalfadhiga 1aad iyo 2aad ee gelinka hore ee isla maalintaa 28/9/75 aqoon-isweydaarsiga lagu soo qaaday si ardada ay ula socoto taxnaanta aqoon-isweydaarsiga wuxuu Jaalle Xuseen Kulmiye ku wargeliyay ardada in Jaalle Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka, ahna Guddoomiyaha Guddiga Barwaaqeynta uu kalfadhiga ku soo kordhay si isagana wixii looga baahdo uu u kordhiyo.

Jaalle Xuseen markaa u caddeyay in fadhiga uu furan yahay arrinta laga hadlayana tahay Dhismaha iyo Magaaleynta Degmooyinka Bulshada Cusub ee Danwadaagta ah. Hadalka waxaa la siiyay Maxamuud Yuusuf Ciise oo kooxdii dhismaha ka wakiil ahaa si uu warbixintooda u qaddimo wuxuuna Jaalle Maxamuud warbixintii ku muujiyay: DHISMAHA IYO MAGAALEYNTA

Ardada marka ay tageen Degmooyinka cusub ee loo kala diray waxay isu qaybiyeen guddiyo kala duwan si ay xilalka u kala qaybsadaan isuduwidda shaqooyinkana ugu fududaato. Guddiyadaa la sameeyay waxaa ka mid ahaa Guddiga Dhismaha oo xilkiisu ahaa guud ahaan wixii dhismo ah oo looga baahan yahay iyo qorshihiisaba u habeeyaan una fuliyaan.

--------------------

1 - KOOXDA CABBIRAADDA:

waxay qaabilsanaayeen dhulbaneynta iyo cabiridda. Horraan waxay bilaabeen in ay dhulka dadka la dejin lahaa baneeyaan, ha lagu baneeyo xoog dad ama mid cagaf cagafyo. Arrinta Dhulbaneynta marka ay dhammaatay waxay u dhaqaaqeen xagga cabbiraadda taasoo Degmooyinka Sablaale iyo Kurtunwaarey u sinaayeen ama isku bah ahaayeen xagga Dhulgoynta iyo cabbirkaba. Qorshaha Dhulgoynta labadan degmo wuxuu ahaa m. 24x60 (hal bloog), bloogaas oo ka koobma 24 qol qolkiiba cabbirkiisu yahay m. 4x4. 3dii qolba waxay ku fadhiyaan dhul dhan m. 12x12 waxaa ka dhexeeya deer, musqul iyo jiko.

/...

Degmada Dujuuma dhulgoynteeda iyo cabbirkeedu waa ka duwan yahay labada degmo ee Kurtunwaarey iyo Sablaale waxayna u qorsheysan tahay bloog cabbirkiisu yahay m. 26x152. Bloogiiba wuxuu ka koobnaa 22 boos oo ay ka dhismi karaan 66 qol. Tala gal ay ula jeedaanna uu yahay boos cabbirkiisu yahay m. 13x13 oo deerkiisu u xiran yahayba hal qoys la dejiyo.

2 - KOOXDA DEJINTA:

Kooxdan waxay u xilsaarnaayeen qoyswalba in dhulka rasmi ahaan loo cabbiray ay dadka dejiyaan oo ay u bartilmaamaan qoyswalba halka uu aqalkiisa ka mudanayo si ayan u dhicin hab xumo oo qof walba halkii la fiicannata iska dego qorshihii magaalada iyo dejintiiba u hab wareerin.

3 - KOOXDA QABANQAABADA DHISMAHA:

waxay u xilsaarnaayeen diyaarinta gaadiidka lagu soo ran dhista iwm, iyo diyaarinta iyo qalqaalinta qalabka dhismaha guud ahaan looga baahanyahay.

4 - KOOXDA KORMEERKA DHISMAHA:

Kooxdan waxaa xilkoodu ahaa in ay kormeer joogto ah ku sameeyaan dhismaha Degmada ka socda wixii dhibaato ah ay la kulmaan isla goobta ku xalliyaan wixii kalena ay la xiriiriyaan kooxda ku habboon.

Guud ahaan waxaannu oran karnaa in Guddiga Dhismaha uu xilkiisa si habsami ah u gutay una hirgeliyay arrmaha dhismaha. Muddadii dhismaha socday ka mas'uul ahaayeen waxay ka faa'iideeyeen farsamouaqaanno kasoo gurmaday degmooyinka ku dhow iyo kuwa laga soo xulay bulshada cusub ee Danwadaagta Beeraleyda ah.

DHIBAATOOYINKA

Shaqo kasto iyo mashruuc kastoo la hirgelinayo dhibaatooyin ayaa lala kulmaa. Sidaa oo kale Guddiga Dhismaha dhibaatooyin buu kala kulmay hirgelinta dhismaha, kuwaasoo ka mid ah:

b) dadkii oo la dejiyay iyadoo wax maab ah oo loogu tala galay ayan jirin;

t) maabkii hore loo sameeyay waxuu waafiqi waayay habkii ay u dooneysay Dawladdu in loo dejiyo bulshada cusub ee beeraleyda;

j) in la waayay qalabkii cabbiraadda ay ka mid yihiin mitirka,

...

4 - in dhismaha guryaha la dedejiyo maadaama xilliga deyrta ah ay soo dhowdahay dadkana badidiisa ay xagga hoyga ka liitaan;

5 - tababar xagga howlaha farsamada dhismaha laga furo si degmada isugu filaato loogana hortago dhismaha nidaamka daran (abusivo);

6 - qalab iyo gaadiid ku filan degmo kasta inay hesho si loo hormariyo hawsha dhismaha;

7 - in degmo kasta laga furo laamaha xafiisyada kala duwan si da Boostada, Bangiyada iwm.;

8 - maadaama marka roob da'o jidadka degmooyinka cusub la xiriiriya magaalooyinka kale ay xirmayaan siiba degmooyinka Sablaale iyo Dujuuma ay bad xireen noqdaan waxaa laga maarmaan ah in jidadkaa ay degmooyinka u dhow ikala xi-xiriirayaan loo hagaajiyaa oo la dhisaa. Degmada Kurtunwaarey waddada la xiriirisa Shalambood dhowaan ayaa la dhammeeyay;

9 - in degmooyinka u soo gurmaday ka qayb galka dhismaha degmooyinka cusub aanay ka goosan gacan siintá ay hore u bilaabeen;

10-- haddii guryodhiska laga gaarsiin karin xilliga dayrta waa in dadka oo idil laga simaa Bac si roobka uga gaashaantaan;

11 - dadka la dejiyay degmada Baraawe, meesha ay deganyihiin oo ku badan xasharaad caafimaadkooda wax yeeleynayo, waxaa lagu talinayaa in laga raro meesha hadda ay deggenyihiin lana dejiyo dalxiiska shishadiisa;

12 - in degdeg loo dhamestiro dhismaha bakhaaraha kaydinta daawada iyo raashinka.

ulaha gadgaduudan (paline) iwm, haseyeeshee shaqada uma ayan istaagin qalab darri awgeed waxaana la isticmaalay xargo, u-laha teendhada iwm.

x) Dadka la dejiyay oo weli aan garan cabbiraadda ahmiyadda ay leedahay awgeed waxaa dhacday in qoryihii bakeetiyaasha loo gu tala galay in lagu aqoonsado cabbirka ayay qoryo ahaan inta u qaataan shiteen iyo caruurta oo inta ay siibaan ku ci-yaaraan, taasoo ay keentay in cabirkii hore lagu laabto.

MASHRUUCYADA DHISKA BULSHADA

Mashruucyada dhiska bulshada waxaa ka hirgalay:

1 - Golayaasha dhexe ee hanuuninta dadweynaha
2 - golayaasha hanuuninta xaafadaha
3 - beeraha lagu nasto
4 - dugsiyo iyo meelaha caruurta lagu xannaaneeyo
5 - gegidaha cayaaraha isboortiga
6 - saldhigga booliska
7 - bakhaaradda kaydinta dawooyinka iyo cunnada
8 - isbitaalo
9 - haamaha biyaha laga dhaansado
10 - nalalka iwm.

TALOOYINKA GUDDIGA DHISMAHA

Maadaama aannu aragnay dhibaatooyinka ka taagan xagga maabka runtiina ay aad u xun tahay in magaalo cusub aan maa la-heyn la dhiso waxaa lagama maarmaan ah in:

1 - mashruuc kasta oo ay Dawladdu ka fulinayso degmooyinka cusub ee danwadaagta ah in loo dhiibo dad aqoon gaar ahaaneed u leh mashruucaas lana siiyo awood iyo warbixin buuxda ku saab san fulinta mashaariicda;

2 - in si degdeg ah loo suubiyo maababka degmooyinka dadka la dejinayo lana waafajiyo habka bulsheynta danwadaagta beera-leyda ee degmooyinka kala geddisan;

3 - haddii ay suurto geli karto waa in laga hortagaa nabaad guur ka dhulka oo ka imanaya dhirta loo jarayo xagga dhismaha taasoo aan isleenahay waxaa lagu beddeli karaa blokeeti iyo jilay (tegole) laga sameeyn karo dhoob iyo caws oo isku ji-ra oo la dubo, waxaana la sheegay in laanta Buur lagu samee yo tijaabo ceynkaas ah haddii ay tijaabadaas hirgashay laga fa'iideeysto, haddii kalena si cilmiyan loo sii baaro si ay berrito u noqoto fikrad degmooyinka dalkoo idil looga fa'ii deeyo;

...

WARBIXINTA DHAQAALAHA

HORDHAC

Jaallayaal, sida aan wada ogsoonnahay dhaqaaluhu wuxuu noo tilmaamayaa habka u wanaagsan oo loo isticmaalikaro hantida lahaysto. Saas awgeed hawlaha Dawladdu qabanayso waxay had iyo jeer ku dhisanyihiin ujeeddo dhaqaaleed sida hirgelinta Ololaha Horumarinta Reer miyiga, kicinta dadweynaha iyo abuurista habka kala dambaynta bulshada iyo adkeynta habeynta maamulka shaqada. Sidaas oo kale ujeeddada barnaamijika dejinta waxay tahay in laga faa'iideysto xoogga, maskaxda iyo khayraadka dhulkeenna ku jira lana gaaro isku-filaansho dhinac kasta ah, iyadoo laga waano qaadanayo dhibaatooyinkii hore noo soo maray oo ay ka mid tahay abaartii dabadheer.

Inkastoo horey loo yiri, horumarka dalkasta wuxuu ku xiranyahay hantida lacageed iyo qalabka uu urursado, taasoo run ahaan annaga muddo gaaban noogu suuragaleyn, haddana waxaan muujinnay in maskaxda iyo muruqa bulshada Soomaaliyeed oo la isugeeyo hirgelinayaan himilooyinka la doonayo xagga horukaca dalka: taasu waxay waafaqasantahay tusaalihii Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka oo ahaa in "Marka Alle wax ku siinayo wuxuu kuugu deeqaa maskax fiican".

Jaallayaal, sidaan kor ku soo sheegnay dhaqaaluhu wuxuu saameynayaa dhammaan arrimaha la xiriira ummadda ha noqoto siyaasadda, bulshada, taariikhda, habka teknooloojiyada ku habbon in la isticmaalo, maamulka loo baahanyahay, xiriirka ka dhexeeya shaqada iyo qalabka lagu shaqeynayo. Saas darteed arrimihii hadda ka hor laga hadlay waxay ka qaybqaadanyaan horumarinta dhaqaalaha bulshada beeraleyda cusub iyo dalkoo idil.

Haddii aan wax ka tilmaanno sida uu yahay dhaqaalaha dalkeennu, waxaan xusuusannahay in dadkeenna boqolkiiba 70% yahay reer guuraa xoola dhaqato ah oo hadba meel ula haysha tira yar oo ari ah ama geel ah. Halkaas waxaa ka dhashay dhibaatooyin fara badan oo curyaamiyey kobcinta dhaqaalaha kana mid yihiin:
1) in xoog badan ku qarsoonaado miyiga, saas darteed la intifaacsanwaayey khayraadkii kale; 2) dawladdu waxaa u suurogeli waayey inay dadkaas reermiyiga ah gaarsiiso tabaha iyo dhaqanka xannaanada xoolaha oo laga helay cilmiga cusub si loo kordhiyo taranka iyo nacfiga xoolaha; 3) waxaa kale oo suurogeliwaayey hirgelinta mashaariicda loo yaqaan "infrastruttura" sida biyaha, waxbarashada, caafimaadka-isbitaallada, isgaarsiinta iyo wixii la mid ah maxaayeelay, majirin hortii qorshe lagu ogaado baahida, meelaha ay ku badan tahay iyo wax ka qabadkeeda,

4) waxaa kale oo la gaarsiin waayey dadkaas reer guuraagga ah ilbaxnimada iyo reer magaaleynta si kor loogu soo qaado garaadkooda iyo midnimadooda Soomaaliyeed taasoo gundhig u ah horumarinta dalka oo dhan. Arrimaha dhan oo aan kor ku soo sheegney waxay muujineyaan waxtarka iyo faa'iidooyinka ay u leedahay barnaamijka dejinta dadka abaaruhu waxyeeloeyeen si loo gaaro himilada barwaaqaynta beesha Soomaaliyeed.

KAALINTA DEJINTU KA GALAYSO DHAQAALAHA DALKA

Horumarka dalkasta waxaa laga qiyaasqaataa heerka uu ka gaaray warshadeynta, ujeeddadaaso Kacaanka Soomaaliyeed ku dadaalayo inuu gaaro isagoo dhaqaalaha u babeynaya waddadaas. Saas darteed beeraha waxay u yihiin saldhig horumarinta watshadeynta dalka waayo waxay soo saarayaan cunto iyo alaabta ceeriin oo looga baahanyahay xagga warshadaha. Kaalinta dejintu ka geysanayso dhaqaalaha waxaa ka mid ah: 1) in laga baxo tacabka keliya (monocultura) loona gudbo tacab kalageddisan (policoltura); 2) in waddanka gudihiisa laga soo saaro cunnada ay u baahan yihiin shaqaalaha ku soo kordhaya xubnaha Dawladda haddii kale waxaa dhacaysa inay badato cuntada dibedda la keenayo taasoo culays weyn saaraysa miisaaniyadda ganacsiga dibedda, isla markaasna ay waddanka gudihiisa ka dhalin karayso wax loo yaqaan "uflazione", 3) in kor u qaadayso aqoonta iyo xirfadda dadka ayadoo ay suuragal noqoneyso hirgelinta waxbarashada iyo tababarrada. Sidaas waxaa natusaysa mashruucyo cunto degdegga ah oo sannad walba xubnaha Dawladda u soo gudbiya shaqaale farsama yaqaan ah; 4) in kor loo soo qaado macayshadda dadka reer guuraaga ah iyo kuwa kaleba; 5) in lagu dhaqaaqo hirgelinta warshadaha dalka oo la xiriiri kara dejinta in kastoo arrima kale loo baahanyahay in la tixgeliyo.

Oderesta barwaaqaynta Bulshada Cusub ee Beeraleyda.

Haddii aannu nahay ardada Jaamiciiyinta, annagoo tixgelineyna xilkaa weyn oo nala saaray (dejinta Bulshada cusub), fulineynana baaqii Kacaanka oo ah in la dhiso Bulsho Caafimaad qabta oo ku dhisan cadaalad ijtimaaci ah, wax soo saarid iyo wax wada qabsi loo siman yahay, iskuma aannan soo koobin hawlaha dejinta dadka tabaalaysan oo keliya ee waxaan had iyo jeer ku dadaaleyney inaan ka feejignaano wax allaale wixii barnaamijka fashalin kara, iyado aannu ka eegeyno xagga dhaqaalaha, xagga siyaasadda, xagga amniga iyo nolosha ijtimaaciga.

Waxeyna arrintani noogu muuqataa laba marxalo:

1. Marxaladda hore waxay ahayd tan dadka laysugu soo ururinayo xarumaha dejinta, agagaarka webiyada iyo meelaha kalluumeysiga

ku hagaagsan. Marxaladdaas ayada ah si fiican ayaa loo qorsheeyey, loona hirgeliyey siiba markii laga qaybgeliyey ardada jaamiiciinta ah oo ka soo hooyey guul weyn oo lagu faani karo, sidaa darteed nalama haboona in laga soo jeediyo wax dood ah.

2) Marxaladda labaad waa habka barwaaqeynta Bulshada Cusub ee Beeraleyda ah, kan loogu talą galay sida uu noqon doono ayatiinka danbe ee dadkaas, waan kan hadba sida loo qorsheeyo ay ku xiran tahay barnaamijkaas najaxidiisu. Isla marxaladda labaad waxaynu u kala qaadi karnaa: Waqti gaaban iyo Waqti dheer (Breve e lungo periodo).

Waqtiga gaaban, wuxuu ku xaddadan yahay muddada ka horeysa inta beeraha la qaybinayo iyo inta ay kasoo baxayaan oo dadkaasi gacantoodi wax kula soo baxayaan.

Waqtiga Dheer; wuxuu ka bilaabmayaa marka qoys kasta ku xirmo meesha uu wax kala soo baxayo; hadaba waxaan talo ku bixineynaa in lagu dadaalo sidii loogu dadajin lahaa waqtigaas, haddii kale weligeed laga bixi maayo kharaj iyo dhibaatooyin fara badan. Taasina waxay ku xiran tahay sida loo qorsheeyo qaabka (Metodo) wax loo dejinayo iyo habka wax soo saarridda sida laysugu xiro.

Haddaba waxaa isweydiin leh, sida aynu haatan wax u dejinay ma tahay mid soo dedejin karta waqtigaas dheer, mase tahay mid ku hagaagsan habka wax soo saaridda ee awoodda dhaqaaleheena iyo aqoonta farsamadeenuba ogolyihiin? Bulsho magaalo iyo bulsho beeraley ah maxaa u dhexeeya ama ay ku kala duwan yihiin xagga wax soo saaridda, innaguse teebaanu dooneynaa inaan abuurno?

Haddii aan ka jawaabno labada suaalo waxay nala tahay aragtidayada in:

-waa marka hore ee, inayan soo dedejineyn waqtiga aan kor kusoo sheegnay ayna tahay mid uusan dhaqaaleheena iyo farsamadeenuba midna ay noo ogoleyn. Sababtuna waxay tahay haddii magaalooyin dadka laisugu geeyo oo la damacsan yahay inay beeraley noqdaan, waxaa dhib noqoneysa sida beeraha loo qaybinayo, sida qoys kasta uu beertiisa uga xirmayo oo had iyo jeer uu uga warqabi lahaa si uu bahalaha uga dhiciyo, xoolo ugu beerto, khudrad ugu beerto iyo sidii u sahal beerta u tagi lahaa ugana iman lahaa, illaa beeruhu magaalada aad bay uga fogaanahayaane; dhinaca kale haddii magaaladiiba beer weyn la wadaajiyo sideebaa dadka loogu wada shaqeynayaa, sideebaa wax loo qaybsanayaa, qalabka waxsoo saariddaase muxuu noqonayaa? Mase dhici kartaa in dad intaa fara leeg oo heerka tacliintoodu aan isla garaneyno waxwalibana ku jiraan inay wax wada wadaagaan? Beertaas oo kale waxay u baahan tahay la isticmaalo heer sare ee teknolojiya ah ha noqoto xagga makiinaddaha, gaadiidka, waraabinta, xagga aqoonta beeraha, xagga

maamulka xisaabaadka iyo dhaqaalaha iwm. kuwaasoo aynaan awood saa u buuran lahayn, sidaa darteed na aanan marna ku talineen.

Fikradda wax wada lahaanshaha waayo aragnimo ayaan u leenahay halka dalkeenu ka joogo. Markaa haddii aanu soo duuduubno jawaabta su'aasha hore, waa maya.

-Tan labaad, bulsho magaalo iyo bulsho beeraley ah xagga wax soo saarridda aad bey ugu kala duwan yihiin, waayo qofka reer magaalaha ihi wuxuu leeyahay khibrad uu magaalada dhexdeeda wax kula soo boxo ha noqoto inuu warshad ka shaqeeyo, inuu wax ganacsado, inuu dowladda u shaqeeyo, inuu dawaarle noqdo iwm ee hawlo ah. Nolosha magaaladuna yari wey ka qabowdahay tan beeraleyda, haddii dusha sare laga eego amase xagga howsha iyo meesha lagu shaqeynayo; sidaa awgeed magaaladda dadku wey soo jiideysaa, markaas ayaa dhexdeeda waxaa ka dhasha dad fara badan oo aan shaqo haysan, dabadeedna ka dhashaan cadooyin fara badan oo xun xun ee dhib u keenaya nolosha ijtimaaciga ah iyo degenaashaha bulshada, sida dhaca, tuugada, dhileysiga, khiyaamada iwm oo xumaan ah. Ruuxa beeraleyda ahise wuxuu ku xiran yahay dhulka, asaga ayuuna dhuunigiisa kala soo baxaa; beerta shaqadeedda iyo gurigiisa wax ugama dhexeeyaan, ama hawl buu ku jiraa ama gurigiisuu ku nasanayaa, markaa wax waqti oo micno darro uga lumayaa ma jiraan. Magaalana wuxuu tagaa marka uu wax kasoo gadanayo iyo marka aan beerta shaqo jirin. Haddaba maxaad moodaa qof reer miyi ahaa oo magaalo la keenay oo la rabo inuu beer tabco, asaga oo markii horeba u haystay beeraleyda nolol hoose, magaaladana nolol sare. Ayadoo ay saas tahay, weliba dadka la dejiyey waxaa ku badan dad ganacsato waaweyn ahaa oo in kastoo xoolihii wax badan dhaafeen, haddana qaarkood weli wax kusii danbeeyaan. Markaa soo ma dhici karto inay hadiyo jeer ku fakaraan nolol magaalo.

Haddii nolosha magaalada iyo tan beeruhu sidaas u kala duwan yihiin aanna dooneyno inaan dhisno bulsho caafimaad qabta ee beeraley ah taaso ayan dheehin caadooyinka magaalo oo xunxun maxaa loo baahan yahay, sideebuuse ku haboon yahay qaabka dejinta iyo habka wax soo saaridduba? Markii aanu su'aalahaas is weydiinay, annaga oo xog ogaal u ah hawlaha ka socda degmada Kurtunwaarey, qiyaasna loogu qaadan karo xarumaha kale ee Beeraleyda cusub, warbuuxana ka haysan qorshaha weyn ee dowladdu ugu tala gashay ayaatiinka danbe ee dadkaas, ayaan annagu haddii aanu nahay Jaamiciinta xil gaar ahaaneed iska saarnay inaan arrintaas intaan intii karaankaya ah u darrisno dabadeedna xalli kii noogula habboon u helno. Maadaama barnaamijkanu yahay mid ballaaran oo door weyn ka cayaari kara dhaqaalaha waddankeenna. Kaasoo haddii uu majaxo sida aynu dooneyno aanna ku raja weynahay kor u qaadi

kara nolosha Ummaddeena iyo magaca Qaran nimadeenuba, waayo dunida oo dhan ayaan tilmaam lagu daydo u noqoneynaa. Haddii uu fashalana guud ahaan hoos ayuu u dhigayaa dhaqaaleheenna wax badanna cawaaqiibtiisu waa loo dhutin doonaa, gaar ahaanna dhaawac weyn ayuu u geysan karaa nolosha bulshada cusub ee danwadaagta ah. Iyada oo barnaamajku muhimadaas leeyahay iyo anaga oo is leh waxbaa laydinka sugayaa maadaama aad tihiin maskaxdii ummadda, ayaa waxay nagu kalliftay inaan aad isugu mashquulino, uga walwalno, ugana fakkarno sidii barnaamajkaas loo najixin lahaa wax kasta oo dhaca. Fikradaas waxaa nala qabi kara qof allaale qofkii jecel horumarka degdeg ah ee Kacaanka hantiwadaaga ahi dalkeena u horseedayo.

Waxay arrintani noogu muuqataa sida tan:

A. QAABKA DEJINTA BULSHADA CUSUB

Annago tixgelineyna heerka isku haleynta iyo inta ay socon karto deeqda iyo mucaawanooyinka ay noogu yabooheen dawladaha saaxiibadeena iyo Ururada caalamiga ah, anagoo tixgelineyna awoodda dhaqaalaheena iyo dadka farahaas leh baahidooda oo ay dhici karto ineynaan bil keliya faraha ku hayn karin, waxaa aad u haboon in lasoo dedeji waqtiga dadkaasi gacantoodi wax kula soo bixi lahaayeen. Haddaba si looga faaiideysto munaasabooyinka aan kor kusoo sheegney iyo xoogga dadkaba waxay noogula muuqataa in loo baahan yahay in dadka loo dejiyo koox koox beeraley ah ee ku fidsan dhulka ay beeruhu ku yaaliin, si halkaas loogu abuuro tuulooyin beeraley ah. Koox kastaan ka kooban tahay 100 qoys oo isugu xiran toban toban qoys kuwaasoo iyaga is maamula sida bulshada Jumhuuriyadda Dadka ee Shiinaha dabadeedna, qoysasku uga xirmaa dhulka toos si ay ugu beertaan xoolo wixii ay u baahadaan sida Lo'da, Digaagga iwm., kuna dhex jiraan waqtiga intiisa badan beerta dhexdeeda si uu had iyo jeer uu beertii uga warqabo, bahalahana uga dhacsado. Waa inaan beerta loo socon wax ka badan 4 km. si waqti fara badan uusan uga dhumin inta uu jidka ku jiro. Dhowrkii koox oo isu dhowba waxay wadaagayaan guddi dhexe oo qorsheeya hawlaha oo dhan, oo la xiriira shaqadooda iyo noloshooda. Isla markaas guddigaas dhexe oo tuuladii kasta qof uga qeyb galayo, wuxuu maamuli doonaa dugsiyada ,Isbitaalada, xanaanada dadka duqoobay iyo caruurta oo tuulooyinkaa ka wada dhexeeya. Xarumaha iminka dhisan Kurtunwaarey, Sablaale iyo Djuma waxay noqon doonaan xarumo dhexe oo waaweyn ee Dawladdu ka maamusho tuulooyinka beeraleyda oo ka farcami doona degmooyinkaas. Waana meelaha ay ku yaalaan Isbitaalada dhexe, Dugsiyada Dhexe, farmashiyadaha dhexe, Bakhaaraddaha dhexe iwm.

B. TACABBEELINTA DADWEYNAHA

Sidii aan hore u soo sheegnay, xukunka ugu weyn oo lagu gaarikaro horumar wuxuu yahay in la helo ummad ku dhisan shaqo kuna abuurantahay xamaasad ah inay la tartanto dadka ka horreysa. Saas awgeed waxaa lagama maarmaan ah in la qaado tillaabooyinka hoos ku qoran oo la xiriira bulshada habeynteeda iyo kicinteeda si loo xaqiijiyo najixidda barwaaqeynta beelaha cusub iyadoo laga eegayo dhinaca dhaqaalaha:,

1. In bulshada lagu abuuro hawada adduunka (Interesse materiale in intese in senso collettivo) si aysan u dhicin in lagu kaaftoomo wax yar oo la helo oo kolkaas hoos u dhiga hiyiga dadka;

2. In qorshe loo sameeyo xoogga ku jira dadka la dejinayo iyadoo loo kala qaybinayo hawlaha looga baahanyahay bulshada, maadaama ay iyagu qabanayaan shaqa kastaba. Taas waxay keeneysaa in qof walba lagu ogaado lagana xaadiriyo goob shaqo;

3. In tababarro la xiriira hawshooda la siiyo iyadoo ay soo diyaarinayaan dad cilmi u leh kuwaasoo loo baahanyahay iney ka shaqeeyaan degmooyinkaas. Maadaama waxqabadka qofku ku xiranyahay aqoontiisa, waxaa loo baahanyahay in la siiyo waayo-aragnimo degdeg ah oo waxtar u noqonkareysa kordhinta tacabkiisa;

4. Waa in beelaha dhexdooda laga dhaqan geliyaa tartan wax soo saarid, looguna talagalaa dhirigelin lacageed ama dhaqaaleed oo noqon karta raashin kordhin;

5. Waa in dadka macalliniinta u noqonaya bulshada cusub kala qaybgalaan shaqada lana tashadaan oo aysan dareesiin kala sarrayn;

6. Waa in bulshada degmooyinka cusub loo suurageliyaa inay la socodsiiyaan dadka kale hawlaha ay qabanayaan, waxay soo saarayaan si qaymo dheeraad ah loogu yeelo shaqadooda;

7. Waa inaysin ka cadilmin xagga helidda qalabka beeraha, farsamada, daawooyinka beeraha loo isticmaalo iyo wm. Gaar ahaan waa in dadkaas loogu deeqaa qalabka farsamada sida alwaaxda, qalabka kabaha iyo biraha;

8. Waa in kormeer joogto ah madaxdu ku samayso dhab ahaanna u ogaadaan habka shaqadu u socoto;

9. Waa in dadka hadda la dejiyey magaalooyinka cusub loo sameeyaa, haddii loo daayo sida ay haatan u deggan yihiin, meelo ay ku nastaan xilliga shaqada beeraha ,meelahaaso noqonaya beerta dhexdeeda. Faa'iidada ku jirta waxay tahay: b. inuu qofku fursad u helo la socoshada beerta gaar ahaan dhibaatooyinka dhici kara; t. inaan loo baahan gaadiid badan oo dadka lagu guro; j. in dadku

ka dhawrsanaado waxyaabaha xun oo shaqadooda hoos u ridi kara kalana kulmi karaan joogidda magaalada; x. in loo fududeeyo dadka shaqada gaar ahaan Haweenka oo qayb weyn ka qaadanaya shaqada beeraha; kh. waa in bulshada lagu abuuraa xasiloonaan xagga raashinka, nabadgelyada iyo maamulka. Waa in dawladduna ugu tabarucdaa lafaha ugu horeeya si dadka lacagta haysta ama kuwa helaya wax uga iibsadaan.

10. Waxaan talo ku bixineynaa in barnaamajkan ee qorsheyntiisa loo xil saaro dad aqoon gaar ahaaneed u leh cilmiga beeraha, dhaqaalaha, bulshada, sharciga, injinyeeriyada iwm. Si ay u soo darsiyaan dabadeedna xalli dhab ah ugu soo helaan. Waayo waxa loo baahan yahay in la soo sugo qorshahayaga si ay aqoonyahannada kor ku sheegan ay usoo hubaaliyaan daldaloolaha kasoo bixi kara qorshahan sababtuna tahay inaan haysanin wax kutub ah oo aan la kaashano arrimaha baadigoobka qorshaha.

C. <u>HABKA WAX SOO SAARIDDA:</u>

Sida ugu habboon oo laga faaideysan karo xoogga baaxadda weyn leh ee xarumahaas laysugu keenay, waa anaga oo isticmaalna hab dhaqaale oo ah (Labour intensive Capital saving) in wixii muruq aynu kusoo saari karno aan kabital weyn la gelin waayo kabitaaluhu aad buu inoogu yaryahay wuxuuna u baahanyahay inaanu ka dalabno dibadda oo dahab kusoo beddelano; markaa wuxuu kordhinayaa waxa inaka baxaya "importazione", dabadeedna culeys weyn u geysanaya "Bilancia dei pagamenti". Isla markaas kabitaalku wuxuu doonayaa kharaj kale ee fara badan sida kharajka joogtada ah (Costi fissi) iyo kharajka isbeddela (Costi variabili) dabadeedna wuxuu kordhinayaa kharajka wax soo saaridda iyo sicirka miraha tacabka oo ka badan kara kan lagu soo saaro xoogga dadka beeraleyda ah kuwaasoo qaata mushaaro ay ku noolaadaan. Taa ulama jeedno inaan qalab iyo kabital la isticmaali karin ee waxaanu u jeednaa in xoogga iyo kabitaalka xiriirkooda sugno oo u liicno weliba xagga xoogga kuwaasoo noqonaya 2:1. Markaas habkeena wax soo saaridda wuxuu noqonayaa Horumar socda teknolojiya la'aan (Sviluppo con progresso senza tecnologia).

<u>GABAGABO</u>

Annagoo gabagabeyneyna waxaan idiin soo gudbineynaa xisaabo ku saabsan kharajka ku baxa degmooyinka beeraleyda cusub. Kharajka lagu qiyaaso inuu ku boxo qofka weyn maalintii wuxuu yahay Sh.So. 4,50 - 5.CO qofka yarna 3,30 - 3.8C Sh. Dhammaan kharajka maalintii ku baxa Degmada Beeraleyda cusub oo ah 103.540 qof wuxuu yahay Sh. So. 455.580-. Bishiina waxaa ku baxa 13.667.30C/-. Sannadkiina Sh.So. 164.007.40C/-. Intaas waxaa soo

raaca kharajka ku baxa shaqaalaha gurmadka ah ee halkaa shaqada loo geeyey. Si loo nidaamiyo raashin qaybinta waxaa loo baahan yahay in degdeg loo habeeyo xafiiska iyo kan xisaabaadka lana geeyo qalabka loo baahan yahay.

Wixii mashaariic ah oo laga hirgeliyey waxaa lagu sheegey warbixinihii hore kuwaasoo qaybweyn ka qaatey guuleysiga barnaamijka dejinta.

B) <u>TALOOYINKA DHAQAALAHA</u>

- waa in loo diraa Beelaha Danwadaagta Cusub dad aqoon gaar u leh Cilmiga Beeraha, dhaqaalaha, Sharciga, Injinyeeriyada iwm. si ay u soo darsaan dabadeedna Xallis loogu gaaro iyado isla markaana xiriir la leh dadka Beelaha Danwadaagta Cusub.
- Waa in laga abuuro Beelaha Danwadaagta dhaxdooda meelo lagu nasto waxna lagu cuno inta shaqada lagu jiro.
- Waa in xoolaha Ummadda ay leedahay meel kasta ha joogaane si gaar ah loo ilaaliyo.
- Waa in la hirgeliya mashaariicda loo yaqaan "Infrastattura" sida biyaha, dugsiyada, Isbitaalada iyo Isgaarsiinta.
- Hay'adaha kala duwanna ee Dawladda si degdeg ah u geyaan wakiiladooda.
- In Sharciga loo dejiyey Beesha Danwadaagta cusub inu ka mid noqdo duruusta laga dhigo Laanta sharciga, sida mida beeraha iyo xoolaha.
- Waa in la darsaa Warshadaha ku habboon Danwadaagta lana helaa guudhiggii lagu hirgelin lahaa.
- In lagu abuuro Danwadaagta jawi dhaqaaleed iyo Iskufilaasho lagana ilaalsho lahaansho gaar ahaaneed.
- In si habsami loo qorsheeyo hawlaha ka socda Beesha Danwadaagta si looga foojignaado Iskahorniinaadkooda iyo in qofwaliba hawl gaar ahaaneed oo Xafiisyadda lagala socdo lagu ogaado.
- In Beelaha Dhexdooda laga abaabulo tartan wax soo saarid, oo ku dhisan kooxkoox looguna talagalaa dhiiri galin noqon kara raashin kordhin iyo wax la mid ah.
- Waa in dadka macalliniinta u noqonaya Bulshada Cusub kala qayb qaataan shaqada isla markaana la tashadaana oo aysan dareensiinin kala sareyn iyo kala soocnaan.

- Si loogu abuuro kalsooni iyo shaqo jeeeel, waa in dad ka mid ah Bulshada la dejiyey loo suura geliyaa inay soo siyaartaan meelaha lagu mataaneeyey si kor loogu qaado waaya-aragnimadooda iyo xammaasadooda.

- Waa in la abuuro xafiis dhexe ee hay'adaha kala duwan ee Dawladda ka heli karaan dhammaan wararka ay uga baahan yihiin beelaha si ay u qorsheystaan, xafiiskaaso ku xiran Agaasinka Guud ee M.G.S.K.

- Waa in teknolojiyada lagu isticmaalayo ay noqoto mid kor u qaadaysa wax soosaaridda iyadoo la tixgelinayo aqoonta isticmaalka dadka iyo hantida la haysto.

- Waa in baaris lagu sameeyaa carrada beeraha si loo dedejiyo hirgelinta mashruuca si loo hubiyo nooca saracà ku habboon. Beeraha beelahaas waa in la xalliyaa dhibaatooyinka hor taagan xagga qalabka ama dayactirka qalabka beeraha, batroolka iyo tirada makiinadaha shaqada.

- Waxaa loo baahan yahay inay Madaxda Sare kormeer joogta ah ku sameeyaan beelahaas aadna loo ilaaliyo habeynta hawlaha kala duwan ee ka socda.

- Dadka kalluumeysatada ee haatan ku nool beelaha beeraleyda waa in degdeg loo gudbiyaa beelaha kalluumeysatada.

- Waa in beeraha beelaha cusub lagu xiraa Xoolaha, sida Digaagga, Idaha, Lo'da, Shinnida iwm.

XIRITAANKII DOODDII AQOONISWEYDAARSIGA

29kii Sebteembar 1975 saacaddu kolkay ahayd 11kii fiidnimo waxaa la xiray dooddii Aqoonisweydaarsiga oo ay soo jeediyeen Ardada Jaamiciinta ah ee Laamaha Sharciga iyo Dhaqaalaha.

Waxaa hamaynkaas Guddoomiye ka ahaa doddaa aqoonisweydaarsiga Jaalle Cabdisalaan Shiikh Xuseen, Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

Xoghayahu wuxuu caddeeyey in aqoonisweydaarsigu ahaa mid aad looga faa'iideystey loona baahnaa. Waxaa kale oo uu sheegey in uu hirgalay guulna laga soo hooyey go'aankii Laba Gole ee ahaa in Jaamiciinta loo diro Raridda iyo Dejinta dadka Soomaaliyeed oo abaaraha ku tabaallobey. Xoghayuhu wuxuu u bogay sida indheergaratonimada leh ee Jaamiciintu usoo qorsheeysay doodda aqoonisweydaarsiga iyo sida habsamida ah oo ay dhammaan uga soo qaybgaleen. Xoghayuhu isagoo hadalkiisii sii wata, waxaa kale oo u sheegey in Jaamiciintu soo guteen waajibkoodii kowaad iyo hawshoodii qarannimo taasna waxaa marag ka sida cilmiga ku dhisan oo ay u soo jeediyeen dooddan iyagoo islamarkaas darsay dhibaatooyinka haysta Beelaha Danwadaagta ah ee Beeraleyda iyo Kalluunsatada soona jeediyey talooyin ka soo baxay dhibaatooyinkaa.

Xoghayuhu wuxuu ardada u sheegay in tacliinteenna Jaamiciga ah ay hortii ku xirnayd dawladdo qalaad oo aan ku kala duwannahay dhaqan iyo dhaqaalaba saas daraaddeed ardayga Soomaaliyeed uusan marna la socon dhaqan iyo dhaqaalaha dadkiisa. Dawladda Kacaanka ahi waxay suurogelisay sidii loo dhaqangediyi lahaa caadooyinkii laga dumaalay shisheeyaha iyadoo lagu qotominayo dhaqaale iyo dhaqan la socon kara siyaasaddeena.

Ka qaybgalka ardadu ka qaybgashay dejinta iyo raridda dadka Soomaaliyeed ee abaarsaday, waxay Jaamiciinta u tahay waayoaragnimo iyo darsi cusub oo u sahlaya waxbarashadooda goobta. Xoghayuhu wuxuu ku soo gabagabeeyey hadalkiisii in ardadu soo baaratay noloshii dhabta ahayd ee dadka reer miyiga ah.